Ugaadhsiga iyo dabin danbiyeedka: Aragtida Khaldanee Islaamnimada, xuquuqda Aadanaha, iyo abuurida ‘Halis gudaha ka curata’

CHR&GJ
center for human rights and global justice
nyu school of law

CHR&GJ
center for human rights and global justice
nyu school of law

Baraarug, indhaha fur, eeg hareerahaaga, arag sida dunidani isxku badashay… Ugu yaraan 5- daqiiqo oo aad ku eegto xaaladahan, ku baadho, kuna raadiso cadaymo dhab ah.

Lejla Duka, waa 13 jir, ahna gabadha Dritian Duka,oo ah eedaysane dacwadeedu taalo"fort Dix Five"

Newburg h waa magaalo saboolnimadu aad u taazbatay. Lacag intee le'eg ayey ku qarash garaysay soo saarida hawshan? Waxay doonayaan in ay maalgeliyaan mustaqbalka bulshooyinkeena, mana ahan in malaayiin doollar lagu qarash gareeyo amuur been abuur ah oo qofna aan badbaadinayn.

Alicia McWilliams,oo ah eedada / habaryarta
David Williams, oo ah eedeysane dacwadiisu taalo "Newburgh Four"

Waxaa jira sheekooyin badan oo isku soo noqnoqonaya. Rag badan oo bulshooyinkeena ka mid ah ayaa la ugaadhsaday, haweenkii iyo carruurtiina waxaa laggagga tagay qabowgii.

Shahina Parveen, oo ah hooyada eedaysanaha Shahawar Martin Siraj

Ugaadhsiga iyo dabin danbiyeedka: Aragtida Khaldanee Islaamnimada, xuquuqda Aadanaha, iyo abuurida 'Halis gudaha ka curata'[1]

Laga soo bilaabo Sebteember 11, 2001, dawlada Maraykanku waxay ugaadhsanaysay Muslimiinta Maraykanka ku nool iyada oo u soo dirtay sirdoonayaal lacag la siiyey, oo aan tababarnayn masaajidyada iyo bulshooyinka Muslimiinta ah. Falkani wuxuu horseeday in kabadan 200 (qof) in lagu soo oogo dacwado la xidhiidha argagixisanimo. Dawladu waxay ku andacootay in dacwadahani ay yihiin guulo laga soo hooyey waxa loogu yeedho dagaalka ka dhanka ah argagixisanimada.Haseyeeshee, sanadihii ugu danbeeyey, shaqsiyaad hore uga shaqeyn jiray Xafiiska Danbi – baadhida Federaalka (FBI), Sharci dajiyeyaasha maxaliga ah, warbaahinta, dadweynaha, iyo kooxaha ka aasaasan bulshooyinka ayaa bilaabay in ay sxu'aalo ka keenaan sharcinimada iyo wax ku oolnimada falalkan. Cambaarayntani waa Walaac laga qabo in noocan siyaasadeed iyo natiijooyinkooda dacwad soo oogida ah ay isku noqonayaan dabin danbiyeed.

Warbixintani waxay darsaysaa saddex dacwadood oo waaweyn oo argagixisanimo, kuwaas oo soo wargeliyeyaasha dawladu ay door muhiim ah ka ciyareen hagida iyo dhisida shirqooladaas kuwaas oo dabadeeto lagu soo oogay dacwado.Sadexdaas dacwadoodba, hay'ada FBI ama Waaxda Boliiska New York (NYPD) waxay wargeliyeyaal lacag la siiyey u direen bulshooyinka Muslimiinta ah ama qoysaska iyadoon wax shaki ah laga muujin fal danbiyeed gaadh ah. Wargedliyeyaasxhu waxay u shaqeeyaan sida sharci- xoojiyeyaasha balse looma tababarin sida sharci- xoojiyeyaasha. Waxaa intaas dheer, waxay ku shaqeeyaan badanaaba faa'idooyin ay ka helaan dawlada, sida hoos u dhigida danbi hore loogu xukumay ama isbadal lagu sameeyo xaaladooda muhaajirnimo, waxaa intaas u dheer lacag lagu siiyo bixinta xogaha muhiimka ah ee ay siinayaan hay'adaha sharci xoojinta. Tallaabooyinkana waxay abuurayaan qaabab dhaqaale-siin oo halis ah.

Xaaladaha ay warbixintan darsayso, waxaa ka mid ah in kuwa dawlada soo wargeliya loo arko in ay dibada ka yihiin muslimiinta islamarkaana u kiciyaan mulimiinta kale in ay ku dhaqaaqaan fal-danbiyeed. Wargeliyeyaasha dawlada waxay soo bandhigaan islamarkaana si waali ah u riixaan fikradaha ku saabsan rabshada jihaadka, waxaanay inta ku badan dhiirigeliyaan eedeysanayaasha in ay rumaystaan in ay waajib ku tahay iyaga in ay qaadaan falal ka dhan ah Maraykanka. Laba ka mid ah saddexdan amuurood, dawladu waxay ku tiirsan tahay nuglaanshaha eedaysanayaasha- saboolnimada iyo dhalinyarada, tusaale ahaan – marka la eego hababkeedan musuqmaasuqa ah. Dhamaan saddexda xaaladoodba, dawladu nwaxay xulatay ama ay dhiirigelisay deegaano gaar ah kuwaas oo eedaysanayaaashu ay kadib

1 Mowduucan "Ugaadhsiga iyo dabin danbiyeedka: Aragtida Khaldanee Islaamnimada, xuquuqda Aadanaha, iyo abuurida 'Halis gudaha ka curata'" waa qormo laga soo koobay tarjumaadii asalka ahayd, waana mid taariikhda la socota May 18, 2011. Fadlan ka tixraac qormada asalka ah ee warbixinta dhamaanteed iyo waliba dhamaan ilaha la soo xigta Boggan: www.chrgj.org/projects/docs/targetedandentrapped.pdf.

© Lyric R. Cabral

noqon karaan bartilmaameedka eedaymaha. Dhamaan saddexda xaaladoodba, dawladu waxay sidoo kale siisay eedaysanayaasha, ama ku dhiirigelisay in ay helaan cadeymo, sida hub ama muuqaalo fiidiyow oo rabshado wata, kuwaas oo hadhowto dambe muhiim u noqonaya qaadida dacwada iyo dambi ku helidoodaba.

Dawladu waxay door muhiim ah ka ciyaartay kicinta iyo qorshaynta saddexdan shirqool ee muujiyey warbixintan—shirqooladaas oo dawladu ka dib "fasxhilisay" kuna soo oogtay. Eedaysanayaashaas dacwadahan lagu qaaday waxaa dhamaaantood lagu helay danbiyom, waana la xukumay, ama waxay mutaysteen xabsi gaadhaya, 25 sano ilaa xabsi joogta ah. Dacwadahan la soo oogay— iyo kuwa kale oo sidoo kale ku tiirsan isticmaalka khaldan ee wargeliyeyaasha— ayaa waxay xudun u yihiin sheegashada dawlada ee ah in wadanku wajahayo halis argagixiso oo dalka gudihiisa ah. Su'aalo muhiim ah ayaa laga keenay doorka ay dawladu ku leedahay arrin kasta oo xaaladahan ka mid ah., iyo waliba kuwa ku saabsan sharciyada la adeegsaday ee dhabaha u xaadhay falalkan. Waxaanay sidoo kale soo jeediyeen walaaca ku saaabsan xuquuqda aadanaha ee aasaasiga ah.

Warbixintani waxay tixraacaysaa eedaymaha dawlada ee ka socota "Newburgh Four" ee ka dhanka ah eedaysane David Williams; ta ka socota "Fort Dix Five" ee ka dhanka ah eedaysane Eljvir, Dritan, and Shain Duka; iyo dacwada Shahawar Matin Siraj. Xubnaha qoysaska David, Eljvir, Dritan, Shain, iyo Shahawar ayaa wareysi laggagga qaaday warbixintan, waxayna muujinaysaa in tahay tacadigii muddada jiitamayey ee la diiwaangeliyey ee ku saabsan Xarunta Xuquuqda Aadanaha iyo Caddaaalada Dunida (CHRGJ) oo ah saamaynta ay siyaasadaha La dagaalanka argagixisads Maraykanku ku yeeshay bulshooyinka Muslimiimta,Carabta, Bariga dhexe, iyo koonfurta Aasiya. Waxaan sidoo kale wazreysi la yeelanay, lana tashanay khabiiro, sxuxuufiyiin, iyo hogaamiyeyaasha bulshada ee darsay arrimahan, waxaan sidoo kale soo urruurinay dukumiintiyo maxkamadeed iyo xog ay warbaahintu tabisay.

Waaya-aragnimada qoysaskii wareysiga lagula yeeshay warbixintan ayaa muujinaya in siyaasadaha dawladu ay dhibaatooyin qota dheer ku hayaan qoysasxka iyo bulshooyinka

muslimiimta ah. Siyaasadaha sharciyada xoojinta la dagaalanka argagixisada iyo falal la xidhiidha waxay dhaawacayaan waajibaadka xuquuqda aadanaha ee saran Maraykanka eek u aadan damaanada xuquuqaha in aan wax la fuquuqin, garsoor xaq ah, xoriyada diinta, iyo fikradaha, iyo waliba xuquuqda in si dhab ah wax looga qabto marka ay dhacaan ku xadgudubka xuquuqaha.

Qoysasku waxay sio furan uga hadleen caddalad darada farsamooyinkan khaldan ee la adeegsaday iyo dacwadaha la soo oogayo ee qarsoodiga ah. Falanqeeyeyaasha isa soo taraya, xubnaha bulshada, aqoonyahanada, iyo khabiirada siyaasada, ayaa bilaabaya in ay ka hortagaan sharcinimada falalka dawlada, iyo fikradaha ah in dacwadahan ay yihiin kuwo muujinaya in ay jirto halis gudaha ah ama ay waznaaajinayso amniga.

Xaaladahan lagu caddeeyey warbixintan ma aha kuwo kaligood iska taagan.Tiro xaalado kale ah ayaa iyaguna wajahay walaacyo kuwaan oo kale ah, kuwaas oo soo jeedinaya in falalka lagu soo bandhigay halkan ay yihiin tusaale lagu xoojinayo hawlaha sharci xoojinta kaas oo bartilmaamaysanaya bulshooyinka Muslimiinta ah ee ku baahsan wadanka. Sida ay warbixintan ku doodayso,dawlada Maraykanka waxaa waajib ku ah in ay joojiso faquuqida lagu hayo bulshooyinka Muslimiimta ah. Ma aha oo kaliya in falalkan hortaagan yihiin kor u qaadida ujjeedooyinka badbaada dadweynaha, balse waxay sidoo kale halis aan loo dulqaadan Karin ku yihiin xuquuqda aadanaha ee aasaasiga ah ee wadanka oo dhan.

I. Dulucda Warbixintan

Siyaasadaha iyo falalka ay warbixintani diirada saarayso waxay yihiin, kuwooda ugu muhiimsan, kuwo ku saabsan barftilmaamaysiga Muslimiinta oo loo arko in ay 'halis weyn ku yihiin Maraykanka'. Qeybtani waxay ka hadlaysaa sharci xoojinta iyo dhaqan-fikradeedyada,ka dibna sharciyada xidhiidha ee lagu maamulo hay'adaha FBI iyo NYPD iyo falalkooda sxharci xoojinta, oo ay ku jiraan isticmaalka wargeliyeyaasha iyo la'aanshaha heerarkii looga baahnaa ee lagu bilaabi lahaa baadhitaanada. Sharci xoojinta iyo dhaqan-fikradeedyada, oo ay wehliyaan sharciyada lagu shaqeynayo, ayaa ogolaaday danbi oogida muuqda ee warbixintan.

1. Ku xidhiidhinta Muslimiinta Argagixiyeyaasha iyo Argagixisanimada

Arrinta koowaad ee sii biirinaysa dhibaatada hadda jirta waxay tahay ku xidhiidhinta Muslimiinta argagixiyeyaasha iyo argagixisanimada. Tana waxaa door aan yarayn ku leh siyaasadaha

dawlada ee bartilmaamaysanaya Muslimiinta una arka in ay yihiin argagixiyeyaasha ugu weyn.Waxaa sidoo kale jira daliilo soo jeedinaya in hay'ada badan oo sharci xoojinta ah lagu tababaro qalabyo Muslimiinta ka dhigaya argagixiyeyaasha ugu weyn.

Waxaa intaas dheer, in dadka wax falanqeeya ay sheegayaan in dawladu ay si joogta ah u isticmaasho dacwadaha argagixisanimada marka eedaysaneyaal Muslimiin ahi ay sameeyaan faldambiyeedyo, balse aanay dacwadahaasi u adeegsan danbiileyaasha sameeya falalkan oo kale ee aan Muslimiinta ahayn. Sidaas oo ay tahay, tan iyo Sebtember 11, 2001, waxaa jiray dhacdooyin badan oo rabshado ah oo dhinaca siyaasada- salka ku haya oo Maraykanka ka dhacay oo ay sameeyeen kuwo aan Muslimiin ahayn marka loo eegodhacdooyinka la sheegayo in shaqsiyaadka lagu dhiirigeliyey Islaamnimada.

Waxaa intaas dheer, in dhismaha argagixiyaha ay "kuwa kale" ku xidhiidhiyaan fikradaha isirka, qoomiyada, diinta, qaranka uu asal ahaan ka soo jeedo, jinsiga, iyo fikradaha siyaasadeed, oo si wax ku ool ah u sababaynaya in Islaamku, Muslimiintu, iyo Muslimiinta ku cibaadaysta diinta ay si xagjirnimo ah halis ugu yihiin danaha amniga qaranka Maraykanka. Waxaana Muslimiinta raga ah lagu shaabadeeyey in ay si gaar ah halis u yihiin. Maaha oo kaliya "Muslimka" iyo"Carabta" in ay u gaar yihiin bartilmaamaysiga diinta iyo isirka balse waa labadaas oo isku dhafan— waxaa ku jirta saxaafada, fikradaha caanka ah, falalka dawlada iyo siyaasadaheeda —kuwaas oo hayb ahaan isku noqonaya "dadka muuqaalka Muslimiinta leh." Dabeecadaha iyo dhaqamada Muslimiinta ayaa sidoo kale lagu sumadeeyey siyaaba kale duwan sida falal danbiyeedyada argagixisada ugu weyn. Taasina waxay dhashay, in saraakiisha sharci xoojintu ay bartilmaameed ka dhigtaan kuwa iyagu loo aqoonsado in ay u muuqdaan ama ay leeyihiin astaamaha Muslimiinta islamarkaana ay la beegsadaan baadhitaanada argagixisanimada, lala socdo dhaqdhaqaaqooda, iyo waliba dacwado lagu soo oogo.

2. Khaladka laga fahansan yahay Xagjirnimada

Qodobka labaadi waa fikirka ah in Muslimiinta Maraykanka si isasoo taraysa loogu qalqaaaliyo xagjirnimada ay ku sameynayaan falal danbiyeedyada huwan magaca Islaamka. Warbixin ay 2007 daabacday Waaxda Booliiska New york (NYPD) oo ciwaankeedu ahaa "Xagjirnimada ka jirta reer Galbeedka: Halista gudaha ka jirta" ayaa waxay muhiim u ahayd soo shaac bixinta falsafada fikirkan. In kastoo fikradahan lagu caddeeyey warbixintan lagu dhaleeceeyey in ay ku tiirsan tahay ilo aad u yar iyo in ay tahay laab la kac, waxay ku naaloonayaan taageero ay k haystaan heerarka ugu sareeya dawlada. Fikradahani waxay ku qotomaan fikirka ah in uu

jiro dhabo gaar ah oo ku arooraya argagixisanimada oo leh tilmaamooyin muuqda. Sidaas oo ay tahay ma jirto daraasad la taaban karo oo cilmi-bulsheed oo soo jeedinaysa in geedi socodkan si kalsooni leh loogu go'aan qaadan karo. Dhibaatada taas la midka ahi, waa iyadoo tilmaamaha xagjirnimadu ay yihiin kuwo balaadhan o diirada saaraya cibaadaysiga diinta Muslimiinta kaas oo ku salaysan kala faquuqid ballaadhan.

Si kastaba ha ahaatee, Dawlada Maraykanku waxay door ka ciyaartaynaaxinta fikirka in "xagjirnimadu" ay tahay geedi socod la garan karo. Intii lagu jiray March 2011, Xildhibaan Peter King ayaa soo jeediyey warbixib si aad ah loo cambaareeyey oo uu u soo bandhigay Kongareeska, taas oo ku andacoonaysay in Muslimiinta Maraykanka si xawli ah loo xag jirsiinayo;Muslimiinta Maraykankuna si waafi ah wax ugama qaban ka hortagida amuurtan; Sidoo kalena bulsooyinka Muslimiinta Maraykanku waxs isxkaashi ah masiinayaan xoojinta sharciga. Dhinaca kale, Madaxweyne Barack Obama, hay'ada FBI, Waaxda Amniga Qaranka (DHS), IYO Xarunta Qaran ee la dagaalanka Argagixisada, ayaa si ballaaran u soo dhaweeyey fikrada xagjirnimada.

3. Qorshaha "Ka hortagida"

Qodobka saddexaad ee arrinta la xidhiiidha waa iyadoo sharci xoojintu ay u wareegtay nidaamka ka hortagida iyo la dagaalanka argagixisanimada, dawladuna ay baadhitaan ku samaynayso shaqsiyaadka iyadoo aan wax caddeyn ah loo hayn in shaqsigu uu sameeyey fal dambiyeed. Habkan ka hortagidun wuxuu xambaarsan yahay in xagjirnimadu ay tahay geedi socod la tilmaansan karo, waxaanu soo jeedinayaa in baadhitaan lagu sameeyo oo dacwad lagu qaado shaqsiyaaadka inta ay ku gudajiraan wajiyada hore ee xagjirnimada, sidaa daraadeedna aanay si buuxda u gudagelin argagixiyeyaasha. Iska daayee diirad ay saarto ilaalinta fal dambiyeedka, habkani wuxuu fududaynayaa dambi u yeelida kuwa "ficiladoodu Muslim yahay," kuwaas oo noqonaya cibaadaysigooda diineed, ku tukushada masaajidka, ama afkaaartooda siyaasadeed ee cambaaraynaysa siyaasada dibada ee dalka Maraykanka. Isticmaalida wargliyeyaasha ayaa u muuqata arrinka muhiimka ah ee qaabkan ilaalinta argagixisanimada.

4. Ogolaanshaha Sharciga Lagu Shaqeynayo

Qodobka afaraad—waxaa si qoto dheer loogu falanqeeyey qeybta soo socota— wana isticmaalka sharciyada iyo siyaasadaha gaarka ah kuwaas oo u fududaynaya hanaanka ka hortagida dambi soo oogid iyo siyaasad meel ka dhac leh, iyada oo sharciyo iyo xeerar haga

loo haynin. Dawlada Maraykanku waxay si xadgudub leh u adeegsatay sharciyo dambiyada ka dhigaya kuwo ka baxsan dabeecadaha kuwaas oo aan u muuqan in ay muujinayaan damacsanaan fal dambiyeed sameyn, sida qalabka taageeraya sharciyo ay sameystaan hay'ado, ama dacwado shirqool ama iskuday. Sidaas oo ay tahay, Waaxda Caddaaladu(DOJ) waxay ballaadhisay awoodaheeda, waxaanay dabcisay ilaalintii muddada fog lagu hayey xadgudubyada, oo ay ku jiraan, balse aan ku koobnayn, dabcinta sharciyada uu Xeer Ilaaliyaha Guud ku hago hay'ada FBI. Si kastaba ha ahaatee, hagayaaasha Waaxda (DOJ) wuxuu qorayaa in mamnuuc ay tahay faaqidaada isirka ee ku aadan qowmiyad ama isir raac, balse si qeexan uma mamnuucayo ka faaloodka ku saabsan diinta ama qaranka laga soo jeedo, sidaas daraadeed tani waxay abuuraysaa daldaloolo isir ka faaloosho oo saameeya amniga qaranka iyo amniga xuduudaha jira. Qodobadan afarta ah ee xhidhiiidhka leh iyo jihooyinkoodu waa kuwo dib isku xoojinaya. Iyaga oo wada jirana, waxay taageerayaan sharaxaada amuurta sida qotada dheer loogu faaqidayo warbixintan—magic ahaana, bartilmaameedka iyo xad gudubka isticmaalka wargeliyeyaasha lacagta la siiyo ee ku dhex jira bulshooyinka Muslimiinta.

II. Sharciga Ka shaqeeya Deegaanka

Tan iyo September 11, 2001, hay'ada FBI waxay haysay laba door oo ah sir uruurin iyo sharci xoojin, awoodeeda xog uruurintuna way fiday, iyadoo diiradeeda, la dagaalanka argagixisaduna, uu u wareegay habka ka hortagida. Sidaas awgeed, hay'ada FBI waxay u muuqataa in si isasoo taraysa ugu siirsan tahay wargeliyeyaasha, basaasiinta qarsoon, hababka kale ee la socoshada dhaqdhaqaaqa si xog loo uruuriyo iyo waliba, sida la leeyahay, ka hortagida argagixisanimada. Su'aalo joojta ah ayaa laga keenay wax ku oolnimada iyo dabeecadaha faquuqida ah ee falalkan, kuwaas oo u muuqda inay bartilmaamaysanayaan Muslimiinta, carabta, Koonfurta Aasiya, iyo B Ulsxhooyinka Bariga Dhexe, sidoo kalena dadka u dhaqdhaqaqa waxay diirda saaraan arrimaha cambaareeya siyaasadaha arrimaha dibada ee Maraykanka. Dhawrkii sano ee ugu dambeeyey, hay'ada FBI oo isticmaalaysay wargeliyeyaasha, marqaatiyaasha la shaqeynaya,[2] iyo basaasiinta qarsoon ee ku hoos jira xayndaabyada siyaasadeed iyo kuwa diineed ayaa waxaa loo soo jeediyey cambaareyn iyo afkaaro kulul.

[2] Haddii si sahlan loo dhaho, "wargeliye" wuxuu si qarsoodi ah ugu shaqeeyaa dawlada, wuxuuna inta badan helaa1 faa'idooyin dhaadhac ah sida lacag ama dacwad loo haystay oo hoos loo dhigo, halka "marqaati fure" uu yahay qof mar ku jiri jiray danbigan oo kale ama shirqool, hase yeeshii dawladu ku qalqaalisay in uu xog bixiyo ama uu ku marqaati furo maxkamada iyada oo taas badalkeeda uu helayo ilnaxariis ah oo lagu eego dacwadiisa.

Wargeliyeyaashu waxay qeyb weyn ku leeyihiin dhibaatooyinkan gaarka ah maadaama ay u shaqeeyaaan sidii sharci xoojiyeyaal balse uma tababarna sidii sharci xoojiyeyaasha. Waxaa intaas dheer, waxay ku shaqeeyaan badanaaba faa'idooyin ay ka helaan dawlada, sida hoos u dhigida danbi hore loogu xukumay ama isbadal lagu sameeyo xaaladooda muhaajirnimo, waxaa intaas u dheer lacag lagu siiyo bixinta xogaha muhiimka ah ee ay siinayaan hay'adaha sharci xoojinta. Tallaabooyinkana waxay abuurayaan qaabab dhaqaale-siin oo halis ah.

Qeybtan soo socota waxay si taxadar leh u darsaysaa arrinta ku saabsan wargeliyeyaasha iyada oo la eegayo sharciga ka shaqeeya deegaanka ee lagu maamulo isticmaalida wargeliyeyaasha, marqaatiyaasha la shaqeeya iyo basaasiinta qarsoon; wax ku oolnimada hagayaasha FBI and NYPD (Booliiska New York) ee hawlahan; iyo difaacida dabingelinta. Sida la soo ifbixi doonta, gabi ahaan ba ma jiori doonaan wax xadidaad ah oolagu sameeyey goorta iyo sida ha'yadaha sharci xoojintu u isticmaalaan wargeliyeyaasha.

© Lyric R. Cabral

1. Xeerarka Guud ee Mukasey

Laga bilaabo Dagaalkii Labaad ee Dunida (World War II) ilaa laga gaadhayey sanadihii 1970 todobaatameey-adii, hay'ada FBI waxay sameysay hawlgalo taxane ahaa oo qarsoonaa oo deeganada dalka ah, oo ay ku jiraan barnaamijkii aan la jeclaysan ee COINTELPRO, oo lagu ugaadhsanayey kooxo kala duwan oo loo arkay in ay ka soo horjeedaaan Dawlada Maraykanka, sida shaqsiyaadkii loo arkay in ay xubno ka yihiin Xisbigii Shuuciga, iyo halganadii xoriyada ee dadka Madaw iyo, iyo waliba kooxa kale oo cambaaraynayey Dawlada Maraykanka. Hay'ada waxay isticmaashay xeelado ay ka mid yihiin wargeliyeyaal qarsoon, duubida dadka teleefoonada kuwada sheekaysanaya, adeegsiga codbaahiyaha qarsoon, furitaanka qarsoodiga ah ee fariimaha laysku diro, iyo meelo u dhicida, iyo ka hortagida hirgelinta Xoriyadaha Hadalka ee Markii ugu horeysa Dib loo habeeyey (First Amendment speech rights). Isaga oo ka duulaya arrimahan, ayuu 1976, Xeer Ilaaliyaha Guud Edward Levi daaha ka qaaday Xeerarkii ugu horeeyey ee lagu hagayo Xeer-Ilaalinta Guud, waxaanu xadidaad degdeg ah ku soo rogay xeelaha ay hay'ada FBI wax ku baadho si looga hortago noocyada xadgudubyada ah ee ku caddaa barnaamijkii COINTELPRO.

Xeerarka Mukasey ayaa waxay dhibaatooyin qota dheer maadaama ay hay'ada FBI u ogolaanayaan in ay ay sharciyeeyaan wargeliyeyaasha iyo xeeladaha la socoshada dhaqdhaqaaqa dadka iyadoo wax caddeyma ah aan loo hayn ama in ay xidhiidh la leeyihiin fal danbiyeed laga shakiyey. Iyada oo xeerarkan la raacayo, tusaale ahaan, waxaa loo ogol yahay hay'ada FBI in ay si ballaadhan u hagto wargeliyeyaasha si ay u soo uruuriyaan magacyada, fariimaha laysku diro, lambarada taleefoonada gaar ahaana dadka isugu yimaada masaajidyada, iyagoo aan wax fal-dambiyeed ah laggagga shakin.

Haddii si khaas ah loo eego, (1) Xeerarkani waxay hay'ada FBI u sxharciyeynayaan in ay xaaladaha qiyaasto ka hor intaanay bilaabin baadhitaano hordhac ah, xaaladahaas oo aanay jirin xog ama eedaymo muujinaya wax khalad ah oo la sameeyey ama halis ku ah amniga qaranka; (2) heerkan daraasadeed, wuxuu xeer ahaan hay'ada FBI u ogolaanayaa in ay isticmaasho xeelado baadhitaan oo adag sida shaqaalaynta iyo u diritaanka wargeliyeyaasha kulanada ama munaasabadaha qarsoodiga ah; dadka oo su'aalo la weydiiyo ama lagu mashquuliyo sheekooyin sirdoon ah iyada oo la qarinayo aqoonsiga dhabta ah ee basaaska; iyo iyadoo fuuqaal ahaan guryaha lagu rakibayo qalab la soconaya dhaqdhaqaaqa, xafiisyada iyo shaqsiyaadkaba; (3) Xeerarkani waxay meesha ka saarayaan ama hoos u dhigayaan waxyaabo badan oo looga baahan yahay in ay ogolaansho uga helaan mas'uuliyiintooda xeeladaha gaarka ah ee baadhitaanka,iyo waliba wakhti xadidan oo baadhitaanadu yeeshaan.

Xeerarkan waxaa lagu hirgeliyaa Xeerarka Hawlgalada Baadhitaanka Gudaha ee hay'ada FBI (DIOGs), kuwaas oo dadweynuhu heli karaan iyadoo waxyaabadan lag saar saaray. Inkastoo googoyntaas badan ay ka hortageyso daraasad dhamaystiran oo ku saabsan xeerarka hay'adan, waxaa iska cad in xeerarka (DIOG) ay hay'ada FBI u ogolaanayaanin ay faraha la gasho hawlbaadhitaan "oo ku salaysan— ama xataa ugu horeynba" ah "'xoriyada xuquuqaha dib loo habeeyey markii ugu horeysay ama ku salaysan isir, qowmioyad, hal qaran ahaan laga soo jeedo, ama diinta,' shaqsiyaadka." Xeerarkan (DIOG) waxay sidoo kale u ogolaanayaan FBI in ay uruuriso "xogta ku saabsan dabeecadaha isirka iyo qowmiyadaha 'oo si macquulnimo leh loo rumaysan yahay in lagu xidhiidhiyo dambi gaar ah ama xubno argagixiso oo ka tirsan bulsho qowmiyadeed", iyo waliba soo uruurinta 'deegaanada ay meheradaha ku leeyihiin qowmiyadaasi iyo xarumaha kale' (oo ay u badan tahay in ay ku jiraan massjidyadu) sababta oo ah 'xubnaha qaar ka mid ah hay'adaha argagixisadu waxay ku nool yihiin oo ay ka hawlgalaan ugu horeynba meelaha ay ku badan yihiin qowmiyada isku midka ah.'"

Xeerarkan iyo hay'ada (DIOG) waxay ka wadashaqeeyaan sharciyeynta la socoshada dhaqdhaqaaqa dadka, xog uruurinta, iyo qariiradaynta bulshooyinka Muslimiinta ah, iyada ool la sameeyey hab sharci xoojin dhib badan oo bartilmaamaysanaya bulshooyin guud, halkii lala socon lahaa shaqsiyaadka looga shakiyey fal dabiyeed.

2. Kalsoonida Wargeliyeyaasha lagu siiyey Xeerarka Mukasey

Iyadoo xeerarka Mukasey iyo kuwa (DIOG) ay hay'ada FBI u ogolaanayaan in ay qoroto wargeliyeyaal islamarkaana ay u dirto bulshooyinka aan laggagga shakin fal dambiyeed gaar ah, waxay sidoo kale wargeliyeyaasha u sharciyeeyaan in faraha la galaan hawlo dhinaca kale ka noqonaya sharci daro, mana qabanayaan mamnuucida saran dambi ku tuurida shaqsiga. Xeerarka Mukasey waxay tilmaamayaan in xeerarka Xeer Ilaalinta Guud eek u aadan Isticmaalka FBI ay adeegsanayso Ila Dadweyne oo Qarsoon– ayaa la shaaciyey sanadkii 2006, ka dibna Xeer –Ilaaliyihii Guud Alberto Gonzales– ayaa xeer kale ku biiriyey adeegsiga wargeliyeyaasha. Xeerarka Mukasey iyo Gonzales waxay labaduba si cad ugu arkaan in wargeliyeyaasha loo ogolaan doono in ay qabtaan hawl sharci daro ah, kuwaas oo ku xadidan oo kaliya falalka rabshadaha wata iyo falalka ay sharci daro tahay in ay fuliyaan xubnaha rasmiga ah ee FBI.

Warbixintii ugu danbaysay ee sanadkii 2010 ay soo sartay Waaxda Caddaaalada (DOJ OIG) ee kun aadanayd baadhitaanada ay hay'ada FBI ku samayso kooxaha u dhaqdhaqaaqa deegaanada ayaa waxay walaac ka muujisay in hay'ada FBI ay dhab ahaan ku dhaqanto xeerarka ay iyadu dhigatay. Tusaale ahaan, Waaxda (DOJ OIG) waxay daraasd rasmi ah ku samaysay dukumiintiyada "bixiyey fikirka ah" in hay'ada FBI ay diirada saarto koox kaliya "iyada oo ka ambaqaadaysa aragtideeda ka dhanka ah dagaalka." Waaxda (DOJ OIG) waxay sidoo kale ogaatay in "hay'ada FBI ay durugsatay mudada baadhitaanada ay ku hayso kooxaha wax u ololeeya ama xubnahooda iyadoo wax loo cuskaday aanay jirin"; waxaa iyana jira "tusaalooyin ah in hay'ada FBI adeegsatay xeelado su'aalo la galiyey iyo uruurinta iyo haynta aan haboonayn oo ku aadan Xogta Dib loo habeeyey ee koobaad ee ku jira faylasha hay'ada FBI."

3. Difaacida Dambi ku dabida

Sida lagu muujiyey qeybtii hore, xeerarka FBI ee la xidhiidha amuurtan waxay bixinayaan daraadado kooban oo ku wajahan baaxada qalabka loo adeegsado la socoshada dhaqdhaqaaqa dadka, oo ay ku jiraan wargeliyeyaashu. Si kstaba ha ahaatee, kuwa si rasmi ah dacwada loogu soo oogay ka dib markii la sameeyey baadhitaan xadgudub ah oo la adeegsaday wargeliyeyaa ayaa waxay sare u qaadaysaa difaacida dambi ku dabida. Si kor loogu qaado horumarka laga sameeynayo difaacida dambi ku dabida, shaqsiga dacwada lagu soo oogay waxaa waajib ku ah in uu soo bandhigo caddeymo muujinaya in ay u badan tahay in aanay ahayn dawlada balse uu yahay wargeliyaha ka horseeday dambiga lagu soo oogay eedaysanaha. Haddii eedaysanuhu ku guulaysto muujinta arrintan, markaa waxaa dawlada waajib ku ah in ay xaqiijiso in eedaysanuhu yahay dambilaawe[3] oo eedaysanaha lagu riixay in uu sameeyo fal dambiyeedka lagu soo oogay.

In kastoo uu wali yahay in uu guulaysto, difaacida dambi ku dabita waxaa laga keenay su'aala badan dacwadaha dambiyada argagixisada ee heer federal in ay ku tiirsan yihiin wargeliyeyaal lacag lasiiyey, oo qarsoodi ah. Eedaysanayaashu waxay inta badan awood u leeyihiin in ay soo bandhigaan in basaaska dawladu iyaga ku riixay in ay sameeyaan fal dambiyeedka, taas oo culayska ku wareejinaysa in dawladu ay la timaado caddeyn ah in ay xaqiijiso in eedaysanuhu yahay dambilaawe ama uu arrintan sameeyey ka hor intaanu la kulmin wargeliyaha dawlada u shaqeeya. Hase yeeshee difaacida dambi ku dabidu wuxuu u guuldaraystay si isdaba joog ah, sababta oo ah garsoorayaasha dacwadaha dhageysta waxay ogaadaan in dambiga aan cidna lagu dabin ama in dawladu la timaato wax cadaynaya in ruuxani uu shaki la'aan dambi leeyahay.

3 "Dacwad aan shaki ku jirin" wa heer sharciyeed oo loo raaco hannaanka dambiyada Maraykanka taas oo ay waajib tahay in dacwada la soo oogay ay ka gudubto fikirka la qabo ee ah in ruuxu uu dambi-laawe yahay ilaa la xaqiijinayo in uu dambiile yahay. Waxaa lama dhaafaana, in dacwada la soo oogay ay qasab tahay in aanay jirin sharaxaad kale oo macquul ah oo caddeynaysa marka laga reebo in eedaysanuhu sameeyey dambiga.

III. Dacwadaha

Qeybtani waxay sxharxaysaa saddex dacwadood oo ka dhacay agagaarka New York-oo ay saamayn ku leedahay dawlada oo bartilmaameed ahaan u isticmaaashay wargeliyeyaasha bulshooyinka Muslimiinta ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaa muhiim ah in la ogaado in isticmaalka xeeladaha aanay ku koobnayn oo kaliya New York ama New Jersey. Waxaa jiray tiro dacwado ah oo ka dhacay qeybo dalka ku baahsan oo muujinaya walaacyo kuwan oo kale ah, soona jeedinaya in falalka dacwadahan lagu soo qaaday ay tusaale u yihiin hannaaanka hawlaha shrci xoojinta ee lagu bartilmaamaysanayo bulshooyinka Muslimiinta ah ee dalka ku fidsan.

Caddeymaha soo socda ayaa waxaa laga soo qaatay wareysiyo isku dhaf ah oo lala yeeshay xubnaha qoysaska eedaysanayaasha, dukumiointiyada maxkamadaha, iyo warbaahinta. Caddeymuhu waxay ka aragti dheer yihiin doorka qura ee ay dawladu ciyaarayso ee ku aadan eedaysanayaasha dacwdahan sida argagixisada, waxaanay sawir buuxa ka bixinayaan doorka dawladu ku leedahay dhismaha arrinta shirqoolka iyo iyagoo soo bandhigya dhibaatooyinka aadaminimo ee ay keeneen falalka iyo siyaasadaha dawlada ee xadgudubka ah. Eedaymaha argagixisadu waxay mugdi galiyeen eedaysanayaasha, sidoo kale xubnaha qoysaskooda kuwaas oo waayey wiilashoodii, nimankoodii, wallaalahood, ama aabyaashood, waxaanay la ildaran yihiin faquuqid iyo handadaad ka dhalatay shirqooladan ay dawladu maleegtay.

A. David Williams – "The Newburgh Four" (Newburgh, NY)

Qoyska

Markii David Williams uu 10 jirka ahaa, hooyadii Elizabeth waxay qoyska ka kaxaysay Brooklyn, waxaanay geysay Newburgh. David aabihii waa la xidhay oo waxaa lagu helay daroogo, iyaduna waxay doonysay in ay ka baxsato danbiga magaalada. Balse Newburgh waa magaalo hoos u sii dhacaysa. Markii David uu hanaqaaday, wuxuu bilaabay iibinta daroogada, wuxuuna ugu dambaybtii lagu xukumay xabsi gaadhaya shan sano.

Ka dib markii la siidaaayey 2007 isaga oo jira 24, David wuxuu bilaabay in uu noloshiisa hagaajiyo. Isaga oo aan haysan shahaadada dugsiga sare iyo waliba isaga oo faylka uu ugu jiro dambi lagu helay, wuxuu la kulmay caqabado weyn. Sidaas oo ay tahay, Elizabeth waxay xasuusanaysaa, "Si wanaagsan ayuu u shaqeysanayey. Waxaan u sheegay, inkastoo dambi laguugu helay, wali waxaad dhigan kartaa kuliyad waxbarasho." In kastoo aanu waxbarashada ku fiicnan, wuxuu watay waxbarashadiisa Kuliyada ASA oo ku taala Brooklyn.

Wallaalkiisa ka yar, ee Lord McWilliams, David wuxuu u ahaa abaha kaliya ee uu tirsanayey. Iyadoo uu wehliyey wallaalkiisa kale, ee Hassan, David wuxuu llaahay ka baryey in uunu mardambe ku celin dambigii uu hore u sameeyey. "Wuxuu markasta isku dayi jiray in uu ituso waxyaabaha nolosha ku haboon iyo kuwa aan ku haboonayn, iina sheegi jiray in aan dugsigayga dhigto, oo aanan wadooyinka iska taagnaan," Lord ayaa sidaasi leh. Horaantii 2009, Lord wuxuu sxhorshaysanayey in uu ku biro ciidanka, iyadoo dhindhihiisa ay qabteen hogaanka ciidamada bada ee Navy SEALs. Bishii March, si kastaba ha ahaatee, caloosha ayaa ka weynaatay oo gaadhay heer laga baqo, dhaqtarkuna wuxuu ka helay kansarka beerka ku dhaca. Lord si degdeg ah ayaa isbitaalka loo dhigay, Davidna murugo ayaa haraysay.

"Waa markii ugu horeysay ee aan arko David oo ooyaya," Lord ayaa sidaasi yidhi. "Maadaama aanu isagu awood u lahayn in uu i daryeelo, waxaan qiyaasi karay sida uu dareemay."

Elizabeth waxay saadaalisay sida uu David uga jawaabi doono arrintan. "Maanan doonayn in aan u sheego sida ay xaaladu u xumayd, sababta oo ah ma doonayn in uu dib ugu laabto iibinta daroogada. Waxaan u sheegay in Lord uu soo ladnaanayo."

David eedadii, Alicia McWilliams, ayaa si wanaagsan u xusuusata wakhtigaas. "David Wuxuu u eegay wallaalkii si qof gabi ahaanba dhinta islamarkaana shan jeer soo noolaaday. Wuxuu ogaa in Lord uu u baahnaa beerka oo laga badelo. Waaya aragnimada ayaa tustay walax ballaaran oo qaab suun leh."



Dacwada

Bishii Abriil 2009, David waxaa loo soo bandhigay fursad uu ku heli karo lacagtii uu u baahnaa in uu ku daaweeyo Lord iyo in ka badan. Qof isku magacaabay James Cromitie ayaa wax uga sheegay isaga nin ganacsada Bakistaani tujaar ah oo uu u yaqaanay oo kaliya Maqsuud, kaas oo u sheektay in uu xidhiidh la leeyahay argagixisada. Wuxuuna u soo bandhigay Cromitie $250,000, dhawr gaadhi oo kuwa lagu tamashleeya ah, iyo maaliyad uu ku furto meel timaha lagu jaro, si ay isga ugu caawiso in uu weeraro argagixiso uga sameeyo Maraykanka. Maqsuud wuxu weydiiyey Cromitie meel wax laga indhaindheeyo, taas oo sidoo kale lacag lagu siin doono. Balse waxa la indha indhaynayo,ayuu Maqsuud ku celceliyey isaga oo ku adkaysanaya, waa in uu noqdaa Muslim. Sida David uu ka dib sheegay, Cromitie wuxuu damacsanaa in uu lacagta helo ka hor intaan qorshaha shirqoolka la fulin. Si kastaba ha ahaatee, Cromitie wuxuu u sheegay David in qofna uu dhaawacmi doonin.

Magaca dhabta ah eeMaqsuud wuxuu ahaa Shahed Hussain. Isagu wuxuu ahaa wargeliye ay FBI lacag siisay kaas — oo sideedii bilood ee la soo dhaafay— ku qalqaalinayey Cromitiein uu ogolaado shirqool bambooyin loogu xidhayo dhismooyin Yuhuudu leedahay. Waxaa ugu horeyntii loo diray Newburgh si uu warbixin uga keeno masaajid halkaasi ku yaala, Masjid Al-Iklas, waxaanu diirada saaray Cromitie ka dib markii si joogta ah uu u kordhay shakiga Masjidka ee isku daygiisa in uu iyaga kala halo jihad la qaado.

Hussain wuxuu khibrad hore u lahaa badhitaanada uu u sameeyey FBI. Wuxuuna ku caawiyey FBI in ay dambi ku helaan dacwad lagu soo oogay hantiile lahaa hotel la yiraahdo (pizza-parlor) iyo Iimaan masaajid ku yaala Albany. Deeqsinimda Hussain kuma ekayn Cromitie oo kaliya. Wuxuu u sheegay Elizabeth in marka uu bogsadohat Lord, in uu qoska oo dhan uu geyn doono Disneyworld. Lord ayaa dib u xasuusanaya arrintaas, “Markii ugu horeysay ee ay hooyo ii sheegtay arrintaas,waxaan is idhi alla ninku fiicanaa.”

Bishii May 13, 2009, iyadoo FBI ay hagayso, ayuu Hussain gaadhi ku ka xeeyey Cromitie, David, iyo laba kale— iyaga oo u sicda Laguerre Payen and Onta Williams (oo aanu waxba ka garanaynin David)—una sii gudbay Bronx si ay ula socdaan dhaqdhaqaaqa dadka ee

dhismooyin Yuhuudu leedahay. Wuxuu ka dibna u kaxeeyey Connecticut si ay u eegaan gantaalo ay ahayd in ay isticmaalaan. Iyaga oo aan wax ka ogayn, hubku waxay ahaayeen kuwo been ah, waxana soo siiyey FBI.

Habeenkii May 20keedii, Hussain wuxuu Cromitie, Payen, iyo labada Williams u kaxeeyey Bronx. Hay'ada FBI ayaa laba gaadhi dhigay affaafka hore ee bartilmaameedka la soo jeediyey, waxaanay ku amreen Hussain in uu waxyaabaha qarxa uu Cromitie ku qariyo tuutayaashooda. Hussain wuxuu ugu horeyn dajiyey David, ka dibna wuxuu labadii nin ee soo hadhay ku dajiyey gaadhigii koowaad. Ka hor intaanu gaadhin gaadhigii labaad, ayuu Hussain baqtiiyey qalabkii uu wax ku duubayey. Wakhtii gaaban ka dibna waxaa la xidhay afartii ninba.

Xilligaas, Lord wuxuu joogay gurigi ku yaala Newburgh. Markaas ayuunbuu guriga soo galay isaga oo ka yimid xaruntii lagu daaweynayey,waxaanu turub la ciyaarayey saaxiibkii. "Waxaan albaabka ka maqlay jabaq weyn. Waxaan is idhi side wax yihiin, sababta oo ah ma ahayn gadhaacid, waxay ahayd sidii in qof uu albaabka laadayo. Ka dibna kooxada la yiraahdo SWAT team ayaa xoog ku soo galay, Gacmaha ayaa kor u taagay, waana fariistay." Lord iyo xubnaha qoyskiisiiba diba ayaa la geeyey,waxaanay daawadeen FBI oo xog ka uruurinaysa gurigooda. "Ugu horeyntii, waxaan ku fikiray in wallaaalkay uu darooogo ku qariyey gurigeena. Balse ka dib ayaan maqlay arayo odhanaya argagixisanimo, hubka wax gumaada, waan ku wareeray."

Ugu horeyn, Alicia waxay u carootay wiilka ay eedada u tahay. "Waxaan is idhi, muxuu sameeyey (f***) ?" Laakiinse marba marka ay xaalada fahantaba, waxay caradeedu u sii wareegaysay dhinaca dwlada.

"Waxaan fooda la galnay ciyaar siyaasadeed". Xaaladan waxaa hagay, isku soo duway, islamarkaana qoray hay'ada FBI, waxa ay doonayen oo dhana wa dab adhilifyo." Xulashada garsoorkii koowaad ee White Plains, waxay tidhi waxaa xusuustaa, "waxaa loo saarnaa saqafka dushiisa. Taasi waxay ahayd wax qayaali ah. "

Alicia waxay sidoo kale xususataa in David markaa lagu xidhay White Plains, dadku wazxay wadeen qoraalada gaagaaban ee albaaabka soo looga soo dusinayo ee odhanaya in uu argagixiye yahay. "waa la dacweeyey, xukun lagu qaaday, islamarkaana lagu helay muddadii uu xabsiga ku jiray. Kuwii ilaalinayey ayaa loo sheegay in ay si adag u ilaaliyaan isaga. Dacwadahan oo kale, waxaa tahay danbiile intaan dambiga laguugu cadayn."

Bishii October 2010, ka dib sideed maalmood oo si taxadar leh loo falaqaynayey, garsoorku waxay rideen xukun ah in uu dambiile yahay. Bishii May 3, 2011, garsooorku wuxuu diiday fikradaha eedaysanayaasha oo sheegayey in wax laga qabto dhaqamada iyo dambi gelinta foosha xun ee dawlada. Xukumida waxaa la qorsheeyey bishii June. Ugu yaraan waxaa lagu xukumayaa 25 sano, waxaanay raggaasi mutaysan karaan xabsi joogta.

Saameynta Arrintan

Dhaawaca gaadhay qoyska aad ayuu u qotoa dheer yahay.Tan iyo xidhitaankii David, Elizabeth waxay sheegaysaa in ay hlgan ku jirto. “Saaxiibadii aan u malaynayey in aan leeyahay, ma hayo,” ayey leedahay. Waxaa layga saaray dabaqii aan deganaa markii duulaanku dhacay. Waxaanay dhibaato kala kulantay in ay hesho shaqo ama meel ay si joogta ah u degto.

Lord,oo hadda 22 jir ah, wuxuu dareemayaa in xilsaaran yahay. Waxay la tahay, “David u arrintan u galay isaga oo eegaya xannuunkayga.” Tan iyo xidhitaankiisii, waxaa loogu caga jugleeyey in uu Muslim yahay, wallaalkiina uu yahay mid argagixisanimo lagu soo eedaaayey. “Ugu yeerida argagixiso aad ayey uga xannuun badan tahay haddii waxyaaba kale dadka la yiraahdo. Mararka qaarkood, waxaan doonaa in aan sheed iska tuuro. Waxay ila tahay haddii noloshu sidan u adag tahay in dhimashadu ka sahlan tahay.” Maraka qaarkood, wuxuu xataa joojiyaa qaadashada daawooyinkiisa kansarka. “Wallaalkay wuxuu igu yidhaahdaa, ma qaadanaysid daawooyinkaaga, haddii aad dhimato, yaa daryeelaya hooyo? hadda, waxaan taas u arkaa naf jaclaysi. Hadda waxaan qaadanayaa daawooyinkayga. Waxaana isku dayayaa in aan hooyaday hayo.”

Iyada dhankeeda, Alicia McWilliams waxay dareemaysaa in bulshadeedu dayacday, oo ay noqotay hogaanka isku dubariday arrimaha ku hareeraysan dacwada wiilka ay eedada u tahay. Alicia waxay si gaar ah uga xun tahay khayraadka lagu khasaarinayo dacwadan. “Newburgh waa magaalo aad u sabool ah. Lacag intee le’eg ayay ku qarash gareeyeen soo saarida arrintan oo dhan? Waxaa laga doonayaa in ay bulshadeena daraasad ku sameeyaan mustaqbalka, ee maaha in ay malaayiin doolar ku bixiyaan dacwad qayaali ah oo aan habayaraatee amni u keenayn qofna.”

“Waa inaan isweydiinaa, yaa naga qabanaya dawladan nagu talax tagya?” ayey intaasi ku dartay. Mar la weydiiyey haddii ay dareemayso ceeb iyo cadho, waxay tidhi, Maya. Waxaan doonayaa in aan u dagaaalo David ilaa wakhtigu ka dhamaaanayo.”

Alicia waxay si degdeg ah u garwaaqsatay in dacwada David ay tahay uun dacwooyin dhawr iyo toban ah oo wargeliyeyaa dawladu ka abaabuleen bulshooyinka Muslimiinta ah si ay dhalinyarada Muslimiinta ragga ah loogu qalqaaliyo in ay ka qeybqaataan sxhirqoolada ay soo qorsheeyey. Waxay u tagtay qoysas kale waxaanay ku boorisay in ay arrintan kahadlaan. "Waxay tahay in ay bartaan sida loola tacaalo cabsida ka soo ifbixi karaysa u hadalka kuwooda ay jecel yihiin." Dhibaatooyinkaas ka sokow, Aliciawaxay sheegaysaa in u ololaynta xaalada David ay tahay geedi socod wanaagsan oo midha dhalinaya. "Waxaan baranayaa diina cusub iyo dhaqama cusub." Balse waxay ku adkaysatay arrintu in aanayku koobnayn Muslimka oo kaliya. "Tani waxay saameynaysaa dhamaanteen, oo Ameerikaan ah."

Sida uu u dhigay Lord, "Ugu horeyn, waxaan isweydiiyey, waa maxay sababta qoyskeena loo beegsaday? Laakinn ka dib waxaan ogaaday in arrintu naga weyn tahay."

B. Eljvir, Dritan, iyo Shain Duka – "The Fort Dix Five" (Cherry Hill, NJ)

Qoyska

Qoysku wuxuu u ahaa wax kasta wallaalaha Eljvir, Dritan, iyo Shain Duka. Waxay todobada maalmood ee todobaadka ka shaqeyn jireen meel ganacsi oo saqafka lagu sameeyo oo uu abahood lahaa,waxaanay aabahood, Ferik Duka, ku qalqaaliyeen in uu sxhaqada ka fariisto. Ferik ayaa arrintan xusuusanaya, "Waxay iga joojiyeen in aan shaqeeyo. Waxay ii sheegeen, 'Mardanbe m shaqeyn doontid; in kugu filan waad sghaqeysay. Waxaad wadankan timid adiga oo aan waxba haysan, waad noo shaqeysay. Shaqo dheeraada ma qaban doontiin adiga iyo hooyaba.'"

Marka wallaaluhu aanay shaqeynayn si ay u taageeraan qoyska, waxay wakhtigoo firaaqada la joogi jireen shanta carruur ee Dritan. "Waxaan mar kasta aadijirnay goobta nasashada, luga baxsi, waxaana sanad kasta tagi jirnay (Six Flags), iyada oo Jimca kastana aan jeclaan jirnay in aan tagno masaajidka. Run ahaantii waxaan ahayn qoys wakhtigiisa si farxad leh u wadaaga. Qoyskeenu wuxuu ahaa mid isku xidhan," waxaa sidaasi

leh gabadha ugu weyn Dritan, Lejla Duka. Marka laga rebo hal sano oo Dritan la guuuray oo ay dageen guri u dhaw, dhamaan saddexda wallaaalaha ah iyo qoyskoodu waxay ku wada noolaayeen waalidkood iyo wallaalkooda yar ee Burim hal guri oo ku yaala Cherry Hill, New Jersey.

Reer Dukas waa qowmiyad reer Albaniyaan ah oo u soo haajiray Maraykanka markii Eljvir, Dritan, and Shain ay da'doodu u dhaxaysay lix, afar, iyo hal sano iyo badh jir.Zurata and Ferik Duka waxay Ameerika yimaadeen iyaga oo ka soo cararay faquuqii ka jiray dal weynii hore ee Yugoslavia, waxanay waxaanay nolol fiican u sameeyeen wiilashooda. Wax fikrada ah umaanay lahay in labaataban sano ka dib ay carruurtooda la kulmi doonaan dhibaato la mid ah dhibaatadii ay ka soo carareen ee faquuqa—oo ah wadan ay rumaysnaayeen—waxaanay saddexduba ku danbeeyeen xabsi joogta ah oo argagixisanimo oo ay soo maleegtay hay'ada FBI.

Dacwada

Silsiladaha amuurood ee foorariyey dunida qoyska Dukas waxay bilowdeenbishii January 2006 markii Eljvir, Dritan, iyo Shain ay aabahood weydiiyeen in ay fasax qaadan karaan markii ugu horeysay muddo sanado ah.

Afarta wallaalaha ahi waxay todobaad fasax ah ku qaateen deegaanka Pocono Mountains iyada oo ay la socdaan sided saaxiibadooda. Si ay u xusuustaan safarkooda, waxay ku rogeen cajalad DVD meelihii ay safarka ku mareen todobaadka oo ku duubnayd cajalad fiidiyow ah. Wallaalkooda ugu yar, Burim Duka, oo safarka kula jiray, ayaa sharxaya, "waxaan ahayn 11 qof [guys], waxaana doonaynayand in qof kasta nuqul laga siiyo cajalada la soo duubay, sidaas daraadeed waxaan ku leexanay mgaalada Circuit City. Xog hayntii cajalada daawanaysay ayaa maqashay anaga oo Allahu Akbar [God is Great], waxay ku leexatay saldhiga booliiska. Waxaanay iyaguna ku wareejiyeen hay'ada FBI. Ka dibna waxay FBI-du bilowday in ay nadaba gasho."

Cajalada fiidiyowga ah ee laga soo duubay fasaxii wallaalaha reer Duka iyo saaxiibadood ayaa wuxuu muujiyey iyaga oo hawlo nasasho ku jira—oo fardo saran, barafka ku ciyaaraya, kubad dheelaya, islamarkaana tooganaya bartilmaameedyo, iyo xeelada kale oo lagu madadaasho. Balse markii la daawaday DVD, hay'ada FBI waxay bartilmaameed ka dhigatay wallaalaha reer Duka iyo laba saaxiiibadood ah, oo kal ah Mohammed Shnewer iyoSerdar

Tatar, waxaana lagu sameeyey baadhitaano uu wakhti iyo qarash badan uu ku baxay oo soo gabagaboobay in ka badan sanad.

Dawladu waxay wargeliyeyaasha lacag la siiyey u dirtay, Maxamuud Cumar and Besnik Bakalli, oo jooga Cherry Hill. Wallaalaha reer Duka waxay noqdeen kuwo aad ugu dhaw Bakalli, oo dhalashadiisu Albaaniyaan tahay. Wallaaluhu waxay gurigooda keeneen Bakalli, waxaana cuntada Albaaniyiinta ku karisay Zurata oo hooyadood ah. “Waxan xushmayn jirnay isaga. Waxaan u jeclayn sidii wiilkayga,” waxaa sharaxaadaas bixiyey Ferik. Wallaaluhu waxay u malaynayeen Bakalli in uu saaxiibkood ahaa markaas, iyada oo xaqiiqduna ay tahay, in dawladu ay lacag siinaysay, siisayna maqaam sharciyeed oo uu ku basaaso qoyska reer Duka.

Markii arrintu socotay muddo ka badan sanad, Cumar and Bakalli waxaa si qarsoodi ah looga duubayey boqolaal saacadood oo ay la sheekaysanayeen wallaalaha reer Duka, Shnewer, iyo Tatar. Labada wargeliyeyaalba waxay raggaasi ku waaleen hadal rabshado wata, iyaga oo isku dayaya in ay ku kaakiciyaan samaynta fal-dambiyeed iyaga oo su’aalo galinaya raganimadooda, kuna dhiirigelinaya iyaga in ay rogaan cajalado muujinaya shaqsiyaad magaca Islaamka sheeganaya oo sameynaya falal rabshado wata.

Bishii August 2006, wargeliye Cumar wuxuu Mohammed Shnewer u kaxeeyey deegaanka Fort Dix iyo gooba, kuwaas oo dawladu dab adeeto ku sheegtay in ay yihiin “xarun cilmi baadhis military”. Dhawr bilood ka dib, Omar wuxuu wallaalaha tusay liis ay magacyo hub ku qoran yihiin, isaga oo ku qalqaalinaya in ay helaan qoryo dheeraada. Sidaas waxaa sharxaya Burim, “Wallaalahay waxay doonayeen qoryo sababta oo ah waxay u safrayeen mar kale goobta Poconos, iyaga iyo saaxiibadoodba, mana doonayna in ay qoryaha iska sugsugaan marka goobtaas la tago oo la tooganayo bartilmaameedyada maadaama ay ahaaayeen koox ballaaran.”

Wallaaluhu marnaba may tagin fasaxoodii xigay. Bishii May 7, 2007, Dritan iyo Shain ayaa la xidhay mar ay u baxeen in ay qoryaha soo qaataan. Eljvir waxaa lagu xidhay guriga Dritan iyada oo ay horjoogaan Burim iyo dhamaan qoyska Dritan.

Dacwadu waxay ka dhacday maxkamad ku taala Camden, New Jersey. “Mudddo sideed todobaad ah. Hal maalin kamaanaan maqnayn. 9kii/9:30kii ilaa 4:30kii galabnimo ayaan maxkamada joognay,”sidaas waxaa leh Ferik qudhiisa iyo xaaskiisa Zurata oo ka qeybgalay dacwadii socotay.

Sadeexda wallaalaha reer Duka, Mohammed Shnewer, iyo Serdar Tatar waxaa lagu soo oogay shirqool lagu weerarayo Fort Dix iyo hub haysasho. Dacwada shirqool, fal walba oo uu xubin leeyahay waxaa loo arkayaa in kooxda oo dhan ay qeyb ku leedahay, maadaama ay wergeliyeyaashu si ula kac ah isugu dayeen in ay abuuraaan xidhiidh ku filan oo ka dhexeeya wallaalaha, Shnewer, iyo Tatar si doodan loo sameeyo.

Inkastoo ay jireen daliilo cadaynaya difaacid dambi ku dabi, sharciyaqaankii wallaalaha reer Duka wuxuu diirada saaray in aanay wax shir qool ah aqoon ah u lahayn. Waxay ku doodeen in wallaaluhu wax war ah ka hayn heshiiska la sheegay in dambiga ay ku sameeyaan, sidaas daraadeedna in aanay jirin wax ku filan oo muujinaya shirqool. Wargeliye Omar wuxuu xataa ka marqaati furay isaga oo taagan in wallaalaha reer Duka aanay wax fikir ah u lahayn qorshahan, sidoo kalena aanay war ka hayn safarka ay isaga iyo Shnewer ku tageen Fort Dix. Wallaalaha reer Duka waxay sidoo kale maqli karaan cajladaha ay wargeliyeyasashu ay iyaga ugu dhiirigelinayaan in ay taageero ku siiyaan rabshadooda jihad doon. Tusaale ahaan, qareenka Eljvir wuxuu erayadiisii furitaanka ku sheegay noted in Eljvir laga maqli karo cajal,ada isaga oo odhanaya in weerar qaadidu tahay “xaaraan” (forbidden) iyo in ciidamada Maraykanka ee jooga dhulkooda aanay waxba samaynin oo sidaas daraadeed aanay banaanayn ku qaadida falkaas.

Si kastaba ha ahaatee, garsoorku wuu xukumay wallaalaha reer Duka iyo eedaysaneyaashii kaleee dacwada kula jiray. Niyada sare ee codsiga dawlada, ee ah in la dhageysto dacwada ayaa wuxuiu ahaa mid qarsoodi ah, taas oo macnaheedu yahay in qeybaha ay qusayso, tala-bixiyeyaasha, dadweynaha, ama saxaafada ay ogaadaan haybta xubnaha garsoorka ee dacwada qaadaya. Isticmaalida garsoor aan haybtooda la garanayn ayaa waxaa lagu cambaareeyey in ay dhinac u janjeeraaan iyaga qudhoodu si u qiyaameeyaan eedaysanayaasha taas oo halisteeda leh oo la mid noqonaysa sababta loogu baahday in haybta la qariyo. Dacwada ka dib, Garsoorkii lambarka sadexaad ayaa si furan u sheegay in garsoorku ay hubeen “in ay doonayeen in ay sidaasi sameeyaan”— oo raggaasi ay ugu dambaynta weerar ku qaadi lahaayeen saldhiga militariga ee Fort Dix. Qoyska Duka waxay su’aal ka keeneen dhexdhexaadnimada garsoorka, gaar ahaana garsoorkii lambarka sadexaad, kaas oo wiilkeeda— oo ciidanka dada ah— lagu dhaawacay Ciraaq. Waxay si furan u qiratay in daawashadii ay daawatay qaar ka mid ah cajaladihii dacwada lagu soo bandhigay— waa cajaladihii ay soo duubeen wargeliyeyaashu ama ku dhiirigelinayey raga in ay in ay rogaan cajaladaha— ay iyada xusuusisay weerarki lagu qaaday wiilkeeda.

Saameynta Arrintan

Ferik iyo Zurata Duka waxay dalkan yimaadeen iyaga oo soo galooti raja leh, waxay barteen quqada,waxay bilaabeen ganacsi hanaqaaday, waxaa si wanaagsan looga qadarinayey bulshada dhexdeeda, arrinta, aadka u muhiinka ahna, waxay abuureed tolmada –ciyaal dhareedka oo qoysasku jecel yihiin.

Waxaan oo dhan wey isbadeleen markii dawladu ogaansatay in ay ugaadhsato wiilashooda. Eljvir, Dritan, iyo Shain hadda waxay ku jiraan xabsi muddo afar sano ku dhaw, halkaas ayeyna ku jiri doonaan inta nolosha uga hdhay haddii aan lagu guulaysan racfaanka mxkamadeed ee socda. Zurata waxay la halgamaygsaa si furan uga hadalka waxyaabaha isbadalay ee noloshooda kala daadiyey ee dacwadan ay u keentay nolohooda: “Ma sharaxi karayo. Ma nihin dadkii aan ahaan jirnay,ee faraxsanaa. Ma nihin dadkii aan ahayn … halkana dad jooga ma nihin.”

Isla habeenkii ay hay’ada FBI xidhay wiilashiisa, Ferik Duka waa la xidhay isagana, waxaana muddo bil ah lagu hayey meel lagu hayo dadka soo galootiga ah.

Wax kaleba iska daayee, qoyska Dritan waxaa gbi ahaanba laga saaray gurigii uu daganaa ee uu kiraystay. Waxaa xusuusanaysa Zurata,

> “Waxay yiraahdeen hantiileyaashii gurigu [the landlord] ‘ka bixi gurigan kuwani waa argagixisee.’ Waxay noo qabteen saddex maalmood in aan dharkeena la baxno. Waxa qasab nagu noqotay in aan dharka ka soo qaadno gurigii kirada oo aan keeno gurigeena, halkaas oo ay dhooban yihiin dadka saxaafada ka shaqeeya. Waxaan lahaa gaadhi weyn, laakiin qof ka xeeya majiro, qof ku caawinaya ma jiro.”

Markii gurigaas laga saaray, Dritan iyo shantiisa carruurta ahi waxay ku wareegeen waalijdiinta waalidkood iyo adeerkood Burim, halkaas oo ay ku noolaayeen ilaa hadda.

Maadaama aanay joogin wallaalihii oo oo ka shaqeynayeye ganacsi saqafka lagu sameeyo, Burim wuxuu ka tagay dusiga sare si uu u caawiyo xubnaha qoyskiisa ee hadhay. Maadaama uu og yahay in carrurta uu adeerka u yahay ay hada yihiin agoon oo kale,” sidaas waxaa yidhi Burim, “waa aniga qofka taageera hadda … Dhab ahaana waxaa hadda taageeraa afar qoys.” Taas oo culays weyn ku ah in uu xambaaro inan 20 jir ah, Burim wuxuu hadda ka shaqeeyaa shirkadaha saqafka sameeya ee reer Duka; halka Ferik uu ka soo laaabtay hawlgabnimadii oo uu ka shaqeeyo meheradaha kale.

Xilligii la xidhxidhay, shirkadaha reer Duka waxay heshiisyo ay lacagtoodu ku kacayso $400,000 kula jireen dad kale. Waxaan oo dhan si degdeg ah ayey u gudheen ka dib markii la xidhay wallaalaha. Dadkii la shaqeynayey Ferik muddo ka badan toban sano waxay ganacsigoodii u qaateen gooba kale. Macaamiilkoodii ugu weynaa, oo ah waax dabka ka shaqeysa oo deegaankaas ah, yaa sheegay in dawladu ku tidhi in aan wax ganacsi ah la samayn qoyska reer Duka. Boggaga Internetka ee ganacsigooda lagu xayeysiin jiray ayaa lagu sumadeeyey in "argagixisadu isticmaasho," waxaana loo soo diraa taleefoono loogu hanjabayo xarumahooda. Waxay muddo ku hamiyi jireen in ay dhisaan afar guri oo jaar ah, oo midiba uu leeyahay hal wallaala, ayaa maanta waxaa ku adag in ay isdabaraan.

Jaararkii ay reer Duka ugu yeeri jireen guri in ka badan toban sano ayaa hada noqday mid aan lagu noolaan oo soo dhaweyn lahayn. Inkastoo ay qoysaska qaarkood wali ku xidhan yihiin, haddana qoysas badan ayaan la hadlin iyaga. Markii ugu horeysay ee wallaalaha la xidhay, dad aan la garanayn ayaa intay gaadhi soo kaxaystaan oo guriga agmaraan ku qeyliyaan "argagixiso." Bulshada Muslimiinta ah ee Cherry Hill ayaa iyaguna iska fogaaya qoyskan. "Waxay yidhaahdaanwaa nala baqdin geliyey,'" sidaasna waxaa yidhi Ferik.

Ferik iyo Burim aya waxay la tahay in badanaaba lala socdo marka ay gaadhigoooda la socdaaan. Qoyska oo dhan waxay ka shakisan yihiin in dawladu ay dhaqdhaqaaqooda la socoto 24kii saacba. Zurata waxay muujisay cabsida ay ka qabto in magdhaw ahaan wax loogu gaysto iyada qudheeda, ama xataa wax loo gaysto Lejla oo 13 jir ah, maadaama aan si furan uga hadalno xaalada. "Dadka oo la waayaa waa wax joogta ka ah dalkan," waxay tidhi, kalsoonidii xoriyada ee hore iyo caddaaladii Mareykanka meesha wey ka baxeen. Qoysku diyaarad ma raaci karo, maadaama aanu diyaar u ahayn in uu wajaho saacado su'aalo ah oolagula yeeshao garoonka diyaaradaha, hadii aanay wax ka sii xunba ku dhicin. Zurata iyo Ferik ayaa waxay aad ugua cabsi qabaan in Burim isagana laga yaabo in uu noqdo dhibanha xigga ee ay dawladu ugaadhsanayso. "Dawladu waxay hore ula tagtay saddex wiil oo aan dhalay … waa maxay waxa ka horistaagaya in ay la baxdo Burim t?" Zurata ayaa isweydiisay.

Marka, ay safrayaan waxaa gaadhiga kaxeeya Duka. Laba maalmood oo xidhiidh ah ayey bishii July 2010 ku tageen Colorado si ay u soo booqdaan Eljvir, Dritan, iyo Shain, halkaas oo ay ku jiraan tirda maxaabiista ugu badan dalka. Waa markii ugu horeysay ee ay booqdaan muddo billa ah, waxaanay u dhaxaysay gidaar muraayad ah markii ay. Waa markii ugu horeysay ee uu Eljvir la kulmay gabdhiisa Fatima, oo dhalatay markii isaga la xidhay ka dib.

Maadaama qoyska intiisa kale ay joogeen Colorado, Burim wuxuu ku haray guriga. Waxaa isaga loo diiday in uu wallaalihii booqdo iyada oo aan sharaxaad dheeraada la bixin. “Qof kasta wuxuu noogu yeedhi jiray ‘mataanaha-ul iyo diirka,’ waxaan isugu dhaweyn sidaas. Meel kasta waxaan u raci jiray wallaalahay. Hadana wallaalaha ma arag muddo affar sano ah,” waxaa sidaasi xiusuustay Burim.

Tan iyo afartii sano ee ay xidhnaayeen, xubnaha qoyska reer Duka waxay si adag uga shaqeeyeen in ay kor u qaadaan wax ka ogaanshaha dacwadan iyo waxa ay u arkaan hannaanka hawlgalka la dagaalanka argagixisada e caddaalad darada ah ee manta ka jira Maraykanka. “Hazddii aadan adigu hadlin, yaa kaloo kuu hdlaya? Markan helno dad badan oo na [dhageysta], hay’adu FBI ayey garwaaqsan doontaa in ay joojiso waxa ay faraha kula jirto. Waa inaan bilownaa dacwad ka dhan ah FBI, si loogula xisaabtamo waxa ay sameynayso,” waxaa sidaasi sharxay Burim, oo hadda maamula bogga FreeFortDixFive.com website oo ay wallaalihiis lahaayeen.

Lejla, oo iyadu bilawday in ay si furan uga hadasho dacwadan markii ay 11 jirka ahayd, ayaa intaasi ku dartay “maaha oo kaliya dcwada aabahay, waxaa sidoo kale jira boqolaal dacwadood oo tan oo kale ah, waxaana doonaynaa in aan hore u socono, sidaas daraadeed waxaan dhab ahaantii noqonaynaa wadan xor ah.”

C. Shahawar Matin Siraj (Bay Ridge, NY)

Qoyska

Markii Shahawar Matin Siraj uu 16 jir ahaa, hooyadii, Shahina Parveen, waxay hooyadii ka soo kaxaysay Bakistan, waxaanay keentay Maraykanka. Waxay codsadeen magangelyo siyaasadeed maadaama ay ka baqayeen in lagu ciqaabo diinta ay haystaan oo ah Ismaili Muslims, oo ah diin ay dad tirayari ka hystaan dalka Bakistan. Iyaga oo la mid ahaa soogalooti badan oo iyaga ka soo horeeyey, waxay dageen Jackson Heights, Queens, halkaas ayeyna ku noolaayeen tan iyo mudadaas.

Isaga oo aabihii la socda, Siraj Abdul Rehman, oo aan awoodin in uu shaqeeyo dhibaatooyin caafimaad awgood, Shahawar wuxuu bilaabay in uu dhaqaale ahaan ka taageero qoyskiisa iska markii ay yimaameen dalka. Isaga oo waxbarashadiisu ahayd fasalka tobnaad, wuxuu soo qabtay shaqooyin kale duwan ka hor intaanu ka shaqo bilaabin xoghayenimo uu ka noqdo

dukaan-buuggaagta lagu iibiyo oo uu adeerkii lahaa, Buuggaagta Islaamiga iyocajalado, oo ku yaalay Bay Ridge, Brooklyn.

In kastoo uu mas'uuliyad ku qaaday isag oo dhalinyaro ah, hooyadii iyo walaashii ayaa xusuusta tayadii uu laa ciyaalnimadiisi. "Wuxuu ahaa ilmo daacad ah, shaqo adag islamarkaana aan bislaan," hooyadii Shahina ayaa xusuusanaysa. Xataa muddada uu shaqeynayey, Shahina ayaa sheegaysa, "Waxaan ogaa meesha uu wiilkaygu joogo. Waxaan markasta ka warhayey halka uu ku sugan yahay." Shahawar walaasheed, Saniya, oo hadda 24 jir ah, ayaa sidoo kale xusuusanaysa daacadnimdiisa iyo kalsoonida dabeecadeed ee uu lahaa. "Haddii aad wax wanaagsan tidhaahdo, wuxuu ahaa ruux aaahd gabi ahaanba yeelanayso. Wuxuu ahaa mid aan yara caqli badnayn. Wuu iska rumaysan jioray dadka."

© S. Nadia Hussain

Hooyo iyo walaashiiba waxay sidoo kale tilmaamayaan deeqsinimada Shahawar. "Ka dib r September 11, wuxuu dhiigiisa ugu six or ah ugu deeqay dadkii dhibaatadu soo gaadhay. Wuxuu ka xumaa in dadkaan oo dhan la dhibaateeyey, waxaanu doonayey in uu wax caawiyoand." Saniya ayaa xusuusanaysa, "Shahawar wuxuu ila wadaagay wax kasta. Wuxuu ibaray sida loo kaftamo iyo ciyaarida cajaladaha fiidiyowga tartanka gawaarida."

Dacwada

Laga bilaabo bishii November 2002, sarkaal boolis oo qarsoon, oo loo yaqaano oo kaliya magaciisa beenta ah, Kamil Pasha, ayaa bilaabay in uu socsoc aggaarka dukaan-buuggaagta lagu iibiyo, waxaanay isbarteen Shahawar. Wuxuu; la sooi qaday Shahawar sxheekooyin ku saabsan — iyo kuwa kle oo ay ka mid yihiin—9/11, Osama bin Laden, iyo isqarxinta falastiiniyiinta. Shahawar wuxuu sameeyey odhaahyo intii wadahadaladani socdeenkuwaas oo dabeeto loo isticmaalay in dacwad loogu soo oogo isaga.

Ijsla wakhtigaas, nin Masaari Maraykan ah oo 50- jir ah oo lagu magacaabo Osama Eldawoody ayaa wuxuu doonayey in uu u shaqeeyo Waaxda Booliska ee New York (NYPD). Waxaanu soo jeediyey in uu gacan ka geysto teesaroooyin la been abuuray (ID) oo ku dhex wareegaya soo galootiga balse, tass badelkeeda, Waaxda NYPD waxay u sheegtay in ay doonayaan in uu noqdo "indhaha iyo dhagaha" ay ku leeyihiin bulshada Muslimka ah. Eldawoody ayaa

ogolaaday,waxaa si degdeg ah loogu diray masaajid ku yaala Staten Island. Wuxuu noqday nin ku biirida ciidanka u heelan: Maalintii koowaad ee uu shaqada bilaabay wuxuu soo qoray lambarka gaadhi kasta oo taagnaa masaaajidka hortiisa.

Dhawrkii bilood ee xigy, Eldawoody wuxuu sameeyey 575 booqasho oo ku tagay masaajidyo kala duwan, waxaanu soo gubiyey 350 warbixin. Ugu dambayntii, waxaa loo diray Bulshada Islamic Society of Bay Ridge, halkaas oo uu ka helay sharaf si nin diinta u googo'ay islamarkaana aan hadalka la baqin.

Sida laga soo xigtay Shahina, bartilmaameedkii koowaad ee Eldawoody wuxuu ahaa imaamka masaajidka, Sheikh Reda Shata: "Wargeliyuhu wuxuu ugu horeyn dabadhitay imaamka laakiin way u shaqeyn wayday taasi, markaana wuxuu bilaabay in uu masaajidka ku meeraysto si uu u helo bartilmaameed ka sahlan. Markii ay u suurta geli weyday in uu helo imaamka, wuxuu u yimid ninkayga."

Bishii September 2003, Waaxada NYPD waxay u sheegtay Eldawoody in uu saaxiib la noqdo Shahawar. Eldawoody wuu ku guulaystay taas, waxaanu sheegay in ay u sahlanaatay in uu Shahawar "duufsado." Wuxuu sidoo kale ku dhawaaday saaxiibka Shahawar, James Elshafay, oo 19-jir ah oo muddo dheer maskaxda ka jiranaa (schizophrenic), kaas oo ka dib ku marqati furi doona Shahawar markii dacwada lagu soo oogay.

Wakhti ka dib, Shahawar wuxuu Eldawoody ka dhigtay caaqil ka weyn. "Waxaan ahay sida wiilkaaga oo kale,"ayuu yidhi. Eldawoody wuu jaclaystay taas, waxaanu ugu yeedhayey Shahawar "wiilkaygiyoo." Eldawoody wuxuu maalin kasta u kaxayn jiray Shahawar gujriga, waxaanu sharaxaad dheeraada ka soo qufi jiray afkaartiisa ku aadan waajibaadka Islaamiga ah iyo siyaasada. Eldawoody wuxuu habaaray Amerika, wuxuuna ku adkaystay in "ay sharci tahay la daadiyo dhiiga kuwa aan muslimiinta ahay." Eldawoody wuxuu sidoo kale yidhi in imaamkiisu ku yidhi in uu soo saaray sharci ogolaanaya in la dijlo ciidamada Maraykanka. Wuxuu sidoo kale yidhi in aanu doonayn in u idhinto cudur beer xanuun ah oo ba'an(cirrhosis) halka Muslimiintu ay ildaran yihiin— taas oo uu doonayo in uu wax kaqabto."

Shahina waxay xasuusatay in iyada iyo odayguudu ay ka xumaadeen xidhiiidhka isasoo tardaya ee ka dhexeeya Shahawar iyo Eldawoody. "Waxaan Shahawar uga digay ninkan Eldawoody, sababta oo ah wuxuu ahaa darawal aan wanaagsanayn. Muddo, ayuu joojiyey soo qaadidiisa, balse hdana dib ayuu u bilaabay. Waxaan u sxheegay in aanu mardabe soo qaadin, balse wuxuu igu yidhi, 'waa ini jiran, wuu dhimanayaa.'"

Bishii April 2004, markii ugu horeysay ee ay soo baxday fadeexadii ciidamada Maraykanka ee xabsiga Abu Ghraib, Eldawoody wuxuu firsd u helay in uu wax buunbuuniyo oo uu heer kalke gaadhsiiyo. Shahina waxay sheegtay in Eldawoody uu bilaabay in Shahawar uu tuso "sawiro xun xun, aoo laga baqayo oo laga soo duubay xabsigaAbu Ghraib iyo Guantanamo. Haddii aad tusto sawiradan xataa qof aan Muslim ahayn, caro ba'an ayey ku beeraysaa. Qofna una adkaysan karo sawiradan, Eldawoody wuxuu sawiran tusay Shahawar, waxaanu yidi said, 'waajib ayey kugu tahay maadaama aad ruux Muslim ah tahay in aad sameyso jihad adiga oo arrintan ka jawaabaya.'"

Ka dib bilo uu ololaha Eldawoody socday, Shahawar ugu dambayntii wuu kala daatay mrkii la tusay sawirada gabdha yar yar oo Ciraaqiyiin ah o loo hanjabayo Lana kufsanayo; waxaanu u sheegay Eldawoody in arrintan wax ka qabtaan. Eldawoody wuxuu ka dib u sheegay isaga in uu jiro koox layiraahdo "Aqwaanu muslimiin (The Brotherhood)," oo ka hawlgala dhinaca hawdka ee New York kuwaas oo isaga caawin kara. Ka dibna, bijshii May 2004, Eldawoody wuxuu kuwii soo dirsaday u sheegay, "Waxaan rfumaysnahay in hadda la soo gaadhay wakhtigii wax la duubi lahaa."

Xiligaas wakhti u dhaw, saaxiibkii Elshafay ayaa soo saaray qariirad aan kala cadayn oo ah Staten Island— oo uu ku callaaamadaysan yahay xabsi, saldhigyo boolis, iyo buundooyin ku hareeraysan—isaga oo tusy Shahawar. Shahawar wuxuu qariiradii u geeyey Eldawoody, waxaanu u sheegay in uu in uu tusi doono Aqwaanu muslimiin. Maadaama uu maskaxda ka xanuunsan yahay Elshafay, Eldawoody ayaa ku qalqaaliyey isaga islamarkaana su'aalo ka weydiiyey sida ugu wanaagsan ee lagu qarxin karo buundadaVerrazano Bridge.

Horaantii bishii August ee sanadkaasi—iyada oo ay suuragel ay tahay in uu ku xushmaynayey Eldawoody—Shahawar wuxuu soo jeediyey in bambaano lagu xidho wadada dhulka hoostiisa martay ee 34aad (Street subway station) wakhti dambe oo habedyn ah ay sababi karto burbur dhaqaaleoo weyn iyada oo aanu qofna ku dhiman. Mar kale, Eldawoody wuxuu muujiyey in uu xiisaynayo. Wuxuu soo jeediyey in la isticmaalo -235 oo macdanta yuraaniyamka ah iyada oo meel fog laga hagayo qarxintiisa, wuxuu sidoo kale soo jeediyey in Maafiyada Ruuska laga helo qalabka nukliyeerka. In kastoo Shahawar aanay taasi la sahlanaan, Eldawoody ayaa ku cadaadiyey, waxaanu weydiiyey in saldhigaasi leedahay kaamerooyinka la socda dhaqdhaqaaqa. Bishii August 21dii, wuxuu u ka xeeyey Shahawar and Elshafay in ay indha indheeyaan saldhiga. Waxay ku soo noqdeen gaadhigii Eldawoody, waxaanay sawireen qariirad ka dib loo isticmaali doono dacwad ka dhan ah Shahawar.

Laba maalmood ka dib, isaga oo guriga u sii wada Shahawariyo Elshafay, Eldawoody wuxuu war layaab leh ka maqlay labadoodaba: “Wallaal Nazeem waa... aad u faraxsan. aad, iyo aad ayuu u jeclaystay.” Markii Shahawar uu weydiiyeyna, “Qofka uu yahay wallaal Nazeem?” Eldawoody wuxuu kaga jawaabay wuxuu mas’uuliyad sare ka hayaa Aqwaanu muslimiin, waana isaga, oo “aad, iyo aad, ugu faraxsan hawlgalka 34aad. Isagu aad ayuu ugu faraxsan yahay hawlgalka 34aad.”

Shahawar wuxuu yidhi in uu la yaabay sida arrintu ay si degdeg ah ugu dhacayso. Shahawar wuxuu weydiiyey waxa ay la tahay haddii “wallaalkan Nazeem” uu fahmay in weerarkan cidna aanay ku dhimanayn, oo uu badalo amuurta dhawr jeer, balse Eldawoody ayaa xiisaynayey sida ay uga oga’an tahay Shahawar in uu wax ku biiriyo sharshaha. Shahawar wuxuu diiday in uu bambaanada dhigo, balse wuxuu si ku meel gaadha u ogolaaday in uu wax ilaaleeyo. Si kastfaba ha ahaatee, wuxuu ku adkaystay in uu doonayo in uu gug horeyn hooyadii fasax ka sooo qaato. Isaga oo aan ku qanacsanayn dalabkan, Eldawoody wuxuu ku hanjabay in uu u sheegayo “Aqwaanu muslimiin”,waxaanu nyidhi, “Haddi aad ii shaagto in aadan in aadan la sanayn,oo aadan doonayn in aad sameyso, aan si toos ah ugu sheego.... Ma doonaysid in aad sdameyso?” jawaabta Shahawar waxay ahayd, “Maya, ma doonayo in aan sameeyo.” Eldawoody wuxuu markaa dabciyey caddaadiskii: “Waayahay. Waayahay. Taasi waa wax aan isga u sxheegi doono si uu u ogaado, Waayahay? Maxaad hore iigu sheegi wayday?” Shahawar: ayaa ku jawaaba “garan mayo sida loo sameeyo. Waxaan ogahay in aan samedynayo qorshe. Balse, waad ogtahay, garan mayo in aan tagayo oo aan smeynayo. Sidaas daraadeed degdeg? Ma jiro, waxaan suuragal ahayn.” Si kasxtaba ha ahaatee Eldawoody wuu ku adkaystay, Shahawarna wuu ogolaaday ugu dambayntii in uu noqdo ilaaleeye. Tani waxay u muuqatay in Eldawoody uu arrintiisii meel mariyey. Intaanu gaadhiga ka dgan, Shahawar wuxuu bixiyey raaligelin.

Ma jirin xidhiidh dheeraaada oo dhexmaray saddexdooda.Elshafay ayaa ka dib ku maqraatifuray in Shahawar uu isku dayey in uu taageero qorshaha.

Todobaadkii xigay, boolisku waxay Shahawar weydiiyeen in uu yimaado saldhiga sin wax looga weydiiyo dacwad sahlan oo aan wali la xalin, markii Shahawar uu saldhiga tagayna, waxaa loo xidhay dacwado.

Dacwadiisa oo ka dhacday Brooklyn, kuwa u doodayey waxay ku doodeen in Shahawar dambigan lagu shirqoolay. Waxaa dacwadiisa, lo tixraacay, dawlada oo aad ugu tiirsanayd

odhaahyo uu Shahawar sameeyey markii uu la joogay Kamil Pasha. Garsoorku wuxuu Shahawar ku helay dambi, waxaana lagu riday 30 sano oo xabsi ah.

Saameynta Arrintan

Maalin ka dib marki Shahawar la xidhay; Shaqaalaha Waaxdac socdaalka iyo Xoojinta Kastamada (Immigration and Customs Enforcement (ICE) waxay Shahina, Saniya, iyo Siraj geeyeen meel dadka lagu hayo. Shahina iyo Saniya waxay ku qaateen 11 maalmood xarunta Elizabeth, New Jersey. “Xaaladuhu aad ayey u xumaayeen,” sidaas waxaa tidhi Saniya, “ Wax noo gaadh ah ma jirin oo waxaan ku qasbanayn in ku mrayrano cid walba horteeda. Waxay na kala soo ceen laba maalmood ka dib. Hooyaday way ooyeysay oo ooyeysay, oo waxay ku weyqeylinaysay ‘hayga tagin, ha kaxaynina.’ Maanay seexan habaynkii oo dhan.”

Taageerayaashu waxay mudaaharaad ka dhigayeen dhismaha dibadiisa, waxaanay si halhaleel ag u uruurinayeen lacag lagu damiinto qoyska. Markii Shahina iyo Saniya la siidaayey, waxay ogaadeen in dawladu qaadatay buugii bangiga lacagta,oo ay la wareegtay baasabooradoodii iyo aqoonsigoodii, taas oo noloshooda ka dhigaysa mid aan dagannayn. Siraj waxay meesha lagu hayo ku jiri doontaa muddo lix bilooda.

“Waxay naga dhigeen dawarsadayaal,” waxaa sidaas leg Shahina. Saniya waxay muddo ka hartay dusigii, maadaama lacagtii loo leexiyey qareenada noo doodaya. Maadaama biilka u keeni jiray la xidhay, Shahina waxay shaqo u aaday dukaan-buuggaagta lagu iibiyo halkaas oo uu Eldawoody kula saaxiibay wiilkeeda. Ka dib markii ninkeeda la xabsiga laga siidaayey lix bilood ka dib xijdhtaankii wiilkooda, isaga ayaa kala wareegay ka shaqenta dukaan-buuggaagta lagu iibiyo. Tan iyo markaas, wuxuu shaqeynayaa todoba maalmood todobaadkiiba, halka kuwa kale oo dhana ay xabsi guri ku jiraan.

“Qoyskeena oo dhan cabsi ayaa hadhaysay,” Saniya oo murugaysan ayaa tidhi. “Waxay ka baqayaan in ay ku hadlaan gurigeena dhexdiisa. Mid ka mid ah eedooyinkeen nama soo wacin muddo saddex sanadooda. Booqasho ugama tagno sababta oo ah way baqeysaa.” Inan adeeraday iyo ina abtiyaashay oo Shahawar uun nagala ciyaari jiray ayaa marnaba soo booqan qoyska reer Siraj. Saaxiibadii hore jaarka noola ahaa sidoo kale nama soo booqdaan.

Ugu foreyntii Shahina iyo Saniya waxay ahaayeen kuwa baqdin badan oo dhuudhuumanaya. Ma aha oo kaliya in lagu faquuqay xidhiidhka la sxheegay in ay la leeyihiin argagixisada, waxaa sidoo kale dhaawacay xadhigaga ay u geysteen saraakiisha waaxda socdaalku. Ka

dib markii la siidaayey, Saniya waxay ka baqaysay in ay soo laaban doonaan, waxaanay leedahay “argagax ayaa hareeyey.”

Shahina waxay leedahay dhacdxada dacwada wiilkeeda waxay ku balladhatay dhamaan qeybaha nolosheeda. “Waxaan ka walaacsanahay nustaqbalka gbadhayda guur ahaan iyo shaqo ahaanba. Waxay burburiyeen mustaqbalkii carruuurtayada, kuliyadii waxbarasho ee gabadhayda. San ado badan ayaa la lumiyey. Waxaa loo haystaa in “argagixiye” ay walaashii tahay.

Wakhti ka dib, si kastaba ha ahaatee— wacyigelin ballaaran oo laga qaatay dacwada Shahawar haysata in ay qeyb ka tahay hannaan ballaran tahay oo jira — ayaa Shahina iyo Saniya waxay bilaabeen in ay la dagaalamaan dareenkooda cidlanimada ah. Iyaga oo u maraya hay’ad bulsheed oo layidhaahdo Desis Rising Up and Moving (DRUM), Shahina iyo Saniya waxay cod taageero u ah, Shahawar iyo ka horimaashaha dawlada oo isticmaasha wargeliyeyal bartilmaameed ka dhigtay Muslimiinta maadaama ay maleegaan shiqoolo argagixiso oo been abuura. “Cabsi dambe oo qabayaa ma jirto,” sidaas waxaa leh Saniya, “Waxaan dareenkaas xoogan ka helay DRUM, sababta oo ah dad badan ayaa nataageeraya. Wax badan ayaan bartay, hooyadayna waxay noqotay ruux firfircoon. Oo si furan yey u hadashay.”

Shahina waxay ku celcelinaysaa in ay qeyb ka tahay dareenka dhaqdhaqaaq caddaaladeed oo ballaadhan. “Waxaan u tagay DRUM, 2006, tan iyo wakhtigaasna, Waxaan garwaaqsaday in aan anagu ahayn kuwa kaliya ee la bartilmaamaystay, balse waxaa jira qoysas badan oo la bartilmaamaystay, qoysas badan oo wiilal badn ay xabsiyada kaga jiraan.”

“Waxaa jira sheekooyin badan oo isku soo noqnoqonaya. Rag badan oo bulshadeeda ka mid ah ayaa la ugaadhsay, waxaana qabowga lagaga tagay haween iyo carruur.”

D. Hannaanka la Raacay

Sida dacwadaha kale ee ka dhacaya qeybaha dalka, sadexcda dacwadood ee lagu caddeeyey warbixintan dhamaan waxaa qeyb ku leh isticmaalida wargeliyeyaasha iyada oo aanay jirin wax cadeyn hore ah oo muujinaya in eedaysanayaashu ay qorshaynayeen in ay sameeyaan fal dambiyeedyo ka hor intaanay hay’ada FBI ama Waaxda NYPD soo dhexgalin arrinta. Wargeliyeyaasha dawladu maha oo kaliya in ay Muslimiinta dibada ka yihiin, balse waxay sidoo kale diirada saaraan isku daygooda ah kicinta Muslimiinta. Wargeliyeyaasha dawlada

waxay soo bandhigaan islamarkaana si waali ah u riixaan fikradaha ku saabsan rabshada jihaadka, waxaanay inta ku badan dhiirigeliyaan eedeysanayaasha in ay rumaystaan in ay waajib ku tahay iyaga in ay qaadaan falal ka dhan ah Maraykanka.Laba ka mid ah saddexdan amuurood, dawladu waxay ku tiirsan tahay nuglaanshaha eedaysanayaasha- saboolnimada iyo dhalinyarada, tusaale ahaan – marka la eego hababkeedan musuqmaasuqa ah. Dhamaan saddexda xaaladoodba, dawladu nwaxay xulatay ama ay dhiirigelisay deegaano gaar ah kuwaas oo eedaysanayaaashu ay kadib noqon karaan bartilmaameedka eedaymaha. Dhamaan saddexda xaaladoodba, dawladu waxay sidoo kale siisay eedaysanayaasha, ama ku dhiirigelisay in ay helaan cadeymo, sida hub ama muuqaalo fiidiyow oo rabshado wata, kuwaas oo hadhowto dambe muhiim u noqonaya qaadida dacwada iyo dambi ku helidoodaba.

Dawladu waxay door muhiim ah ka ciyaartay kicinta iyo qorshaynta saddexdan shirqool ee muujiyey warbixintan—shirqooladaas oo dawladu ka dib “fasxhilisay” kuna soo oogtay. Eedaysanayaashaas dacwadahan lagu qaaday waxaa dhamaaantood lagu helay danbiyom,waana la xukumay, ama waxay mutaysteen xabsi gaadhaya, 25 sano ilaa xabsi joogta ah. Dacwadahan la soo oogay— iyo kuwa kale oo sidoo kale ku tiirsan isticmaalka khaldan ee wargeliyeyaasha— ayaa waxay xudun u yihiin sheegashada dawlada ee ah in wadanku wajahayo halis argagixiso oo dalka gudihiisa ah. Su’aalo muhiim ah ayaa laga keenay doorka ay dawladu ku leedahay arrin kasta oo xaaladahan ka mid ah., iyo waliba kuwa ku saabsan sharciyada la adeegsaday ee dhabaha u xaadhay falalkan.

Dacwadahan iyo falal kale oo la diiwaan geliyey waxay muujinayaan hannaaan ballaaran oo hawlo sharci xoojin ah kuwaas oo bartilmaamaysanaya Bulshooyinka Muslimiinta ah ee dalka ku baahsan. Sida lagu faafaahiyey qeybtan hoose, falalkan, iyo saameynta ay leeyihiin, waxay walaac weyn ka bixinayaan tiro badan oo xuquuqda aadanaha ah.

IV. Waajibaadyada iyo Tixraacayada Xuquuuqaha Adaadaha

Falalka lagu faafaahiyey warbixintan waxay walaac weyn ka muujinayaaan sida ay dawlada Maraykanku ugu hogaansan tahay waajibaadyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha. Sida hoos lagu faafaahiyey, heshiisyadii caalamiga ahaa ee uu Maraykanku ogolaaday ayaa waxay damaanad qaadayaaan, marka xuquuqaha kale lagu, xuquuqda, dacwad xaq ah, aan kala faquuq lahayn, iyo xoriyada afkaaar jeedintaiyo diinta. Maadaama uu wadanku qeyb ka yahay

Xeerka Caalamiga ah e Xuquuqda Rayidka iyo kuwa Siyaasada (International Covenant on Civil Rights (ICCPR) iyo Xeerka Caalamiga ah ee Mamnuucida Dhamaan Hababka Isir Wax ku soocida (International Convention on the Elimination of All Forms of Racial Discrimination (ICERD), Maraykanka waxaa waajib ku ah inuu xushmeeyo, ilaaliyo, islamarkaana buuxiyo xuquuqaha ay xambaarsan yihiin heshiisyadan eek u aadan dhamaan shaqsiyaadka ku nool dhulkiisa ama uu ka taliyo, waxaana waajib ku ah in uu sidaasi yeelo isxaga oo aan wax kala soocayn. Marka la eego sharciga caalamiga ah, tiro badan oo xuquuqahan ah waxay si isku mid ah loogu raacayaa muwaadinka iyo kuwa aan muwaadinka ahayn.

ISharciga Xuquuqda Aadanaha Caalamiga wuxuu sxidoo kale aqoonsan yahay in wadan kasta uu waajib k saran yahay in uu muwaadiniintiiisa iyo kuwa kaleba ka ilaaliyo rabshadaha, ooy ku jirto argagixisanimadu. Gaar ahaana, Wadanada waxaa qasab ku ah in ay in ay ilaaliyaan xuquuqda in la noolaado iyada oo la raacayo siyaasadaha iyo tallaabooyinka kale ee amniga. Wadanada waxaa waajib ku ah, si kastaba ha ahaatee, inay si isku mid ah u fuliyaan sharciga xuquuqda aadanaha caalamiga ah iyaga oo islamarkaana qaadadaya tallaabooyin lagu sugayo amniga qaranka.

Xuquuuqda Dacwad Faq ah

Isaga oo raacaya waajibaadyadiisa ku xusan xuquuqaha ICCPR iyo ICERD, Dawlada Maraykanku waa in uu damaanad qaadaathe xuquuqda dacwad xaq ah, waana in uu sidaasi yeelaa iyada oo aan wax kala faquuqayn. Gudi Xuquuqda Aadaha ee Jimciyada Quruuumaha Ka Dhaxaysa, (oo ah gudi mas;'uul ka ah dabagalida hirgalinta xuquuqda Aadanaha ee axdiga ICCPR) wali fursad umaa helin in uu tixgeliyo amuurta dabin gelinta ama isticmaalida dabeecada wargeliyeyaasha, taas oo ah ujjeedada dacwadahan ay Warbixintani dirada sarayso. Si kastaba ha ahaatee, Maxkamada Xuquuqda Aadanaha ee Yurub (ECtHR), oo ah hogaanka maamulka sharciyada xuquuqda aadanaha ayaa soo saaray xeerar la mid ah oo lagu xaqiijinayo xaq ah oo lagaga hortagayo baadhitaanada booliiiska ee qarsoon dacwad. Gaar ahaana, ECtHR waxay aqoonsan tahay in dacwad xaq ah looga baahan yahay in ay buuxiso dhamaan geedi socodka dambi baaristu yahay mid xaq ah,oo ku jiraan "habka caddeymaha loo qaaday." Iyada oo la tixgelinayo baadhitaanada qarsoon, ECtHR waxay sheegtay in natiijada ka soo baxda geedi socdka baadhitaanada uu boolisku kiciyo dambi sameynta ay gabi ahaanba yihiin kuwo aan xaq ahayn. Sidaas daraadeed, si loo xaqiijiyo geedi socod iyo xuquuq dacwadeed oo xaq ah waa in aan lagu xadgudbin, basaasiinta

qarsoona ay waajib ku tahay in in ay baadhitaanku u sameeyaan si hufan “oo qunyar socod ah”saameyna kuma yeelan karaan in danbiga la abaabulo halkii laga hortagi lahaa in dambi uu dhaco.” Hadii kalese, isticmaalida cadeymo lagu helay kicin waxay natiijadeedu noqonaysa in eedaysanaha “lagu riixo in aanu helin dacwad xaq bilowgaba.”

Xuquuda kala Faquuq La’aanta

Xaaraantinimaynta faquuqiada aya waxay tahay tiirka kamid ah ilaalinta xuquuqda ee lagu damaanad qaaday xeerarka ICERD iyo ICCPR, oo ka kooban sharciga dhaqameedka caalamiga ah ee daacada loo yahay kaas oo aan la ogolayn in meesha laga saaro, xataa haddii lagu jiro xaalad dadweyne oo degdeg ah. Xeerarka ICCPR waxay mamnuucayaan in wax lagu faquuqo iyada oo laga duulayo qowmiyad, midab, jinsi, luqad, Diin, siyaasad ama fikrad kale, qaran, ama asal ahaanta bulsheed, hantida, dhalshada ama dabaqad kale.Iyada oolaga duulayo xeerarka ICERD, Qeybaha dawladu “waa inay dhaleeceeyaan faquuqida isir ahaaneed islamarkaana ay qaadaan iyada oo aan wakhti ama sxharci lala sugin tallaaabooyin lagu xidida siibayo hababkaas oo dhan.” Xeerarka ICERD waxay faquuqida la xaaraantimeeyey ku qeexaysaa “faquuqid isir” oo ballaadhan oo ay ka miod yihiin

> “kala soocid ka reebid, xakamayn ama tixraac ku salaysan isir, midab,colour, asalka lag soo jeedo, qaran ama qowmiyada laga soo jeedo taas ooo ujjeedadu tahay ama si wax kum ool ah u baab’inaysa ama u burburinaysa aqoonsiga, ku naalooshaha ama adeegsiagiisa, si ummadu isku mid uga noqoto, xuquuqda aadanaha iyo xormnimadaha aasasiga ah ee, dhaqaalaha, bulshada, dhaqanka, ama qeyb walba oo nolosha bulshada ka tirsan.”

In kastoo ICERD, aanay wajigeeda, ka daboolanaynin faquuqida ku salaysan diinta, xeerkaas waxaa loo tajumay in mamnuucida faquuqida diintu, gaar ahaana marka ay si joogta salka ugu hayso faquuqida isirka.

Xuquuqaha Xoriyadaha Diinta iyo Afkaarta

ICCPR waxay damaanad qaadaysa xuquuqaha xoriyad fikirka, xaqnimada, diinta, iyo xoriyada wax cadirida iyo afkaarta. Guddiga Xuquuuqda Aadanuhu wuxuu si cad u muujiyey in Qodobka 18aad ee xuquuqda xoriyada fikirka, xaqnimada iyo diinta … “in ay yihiin kuwo meel fog gaadhaya oo qota dheer; waxay koobaysaa xoriyada fikirka ee arrimaha oo dhan,

qaadashada shaqsiga iyo ka go'naanshaha diinta ama caqiidadiisa, haddii shaqsi ahaan iyo bulsho ahaanba iyada oo la jiraan kuwo kale ay muujin karaan." Qodobka 19 ee xuquuqda xoriyada fikirka, afkaarta iyo xogta waa kuwo iska ballaaran, oo ka kooban "xoriyada raadinta, helida, iyo tabinta xogta iyo fikradaha noocyadooda kala duwan."

Xuquuqada xoriyad fikirka, xaqnimada iyo diintu waxay si toos ah u saamaysay dhaqdhaqaaq la socodka dadweynaha eee dawlada iyo baadhitaanada la dagaalanka argagixisada ee lagu ugaadhsanayo shaqsiyaadka iyada oo loo sababaynayo caqiidadooda. Dawlada oo ku bartilmaamsanaysa bulshada Muslimiinta ah hawlgaladeeda sharci xoojinta ah ayaa waxay sidoo kale muujinaysaa xuquuqda xoriyada fikirka iyo afkaarta marka shaqsiyaadka lala beegsado dabagal ballaaran sababta oo ah iyaga oo qaba fikrado siyaasadeed oo gaarka oo ay baahinayaan. Ka hortagida siyaasadaha xag jirnimada iyo falaka sharci xoojinta Anti-radicalization policies and the law enforcement practices kuwaas oo yeeshay natiijo—ay ku lamaanoobeen cimilada guud ee khalad ka fahanka Islaamkaee wax khasaya— yaaa sidoo kale saameyn xun ku yaasheen xoriyada afkaarta iyo diinta gaar ahaana kuwa bulshada Muslimka ah sida ay u dhan yihiin.

Muslimiin badan — ama kuwa loo arko in ay Muslim yihiin— waxaa si ula kac ah loo badelaa sida ay wax u sameeyaan ama u soo bandhigaan diintooda. Tusaale ahaan, kuwa badan ayaa badelay muuqaalkaooda jidheed ama labis ahaaneed, waxaanay hoos u dhigeen isku soo bixii salaada ama caabudida, waxay badeleen magacyadooda, ama waxay hadda joojiyaan arrimaha ka hadlaya moduucyada siyaasda. Sidan marka la eego, saameynta bartilmaameedka la socodshada dhaqdhaqaaqa dadka iyo faquuqida ka dhanka ah bulshada Muslimiinta ah waxay labaduba sadameyn xoogan kuyeesheen labad xoriyadood ee diinta eek u xusan (qodobka 18aad) iyo xoriyada fikirka iyo afkaarta ee (Qodobka 19aad). Muslimiin badan oo Ameerikaana awood uma laha in ay ku ciibaadaystaan diintooda six or ah,waxaanay ku kooban yihiin in ay awoodooda fikradood ku muujiyaan diintooda iyo aragti dooda siyaasadeediyaga oo aan baqeyn. Daraasado ayaa muujiyey in in Muslimiinta intooda badani rumayssan yihiin in ay noqotay"wax adag noqoshada Muslim adiga oo jooga Maraykanka," halka ugu badnaan saddex qeyb ahaan ay muujiyeen walaaca ay ka qabaan siyaasadaha maraykanka ee la dagaalanka argagixisad ee lagu bartilmaamsanayo muslimiinta oo oola socod dheeraada la saarayo."

Talabixinta iyo Gabagabada

Si loogu hogaansamo waajibaadyada xuquuqda aadnaha ee caalamiga ah, CHRGJ waxay dawlada maraykanka ku boorinaysaa in ay si degdeg ah ugu dhaqaaqdo si ay u hirgeliso tallooyinkan soo socda iyada oo la raacayo sharci xoojinta iyo baadhitaanada la dagaalanka argagixisada, gaar ahaana kuwa isticmaalaya la socodka dhaqdhaqaaqa dadka oo xad dhaaf ah iyo wargeliyeyaasha iyada oo aanay jirin fal danbiyeed gaar ah oo laga shakiyey:

- Dawlada Maraykanku waa in ay ku gacan saydhaa aragtiyada "xagjirniomada" kuwaas oo halis gelinaya xuquuqaha xoriyada diinta, fikrada, iyo afkaarta, waana inay soo afjartaa siyaasdaha iyo hababka dambi soo oogida ee ku salaysan aragtiyadan oo kale.

- Golaha Congressku wa in uu qabtaa dhageysi lagu sameynayo xeeladaha hadda lagu soo uruuriyo sirdoonka — oo ay ku jiraan isticmaalida wargeliyeyaasha ku hawlan baadhitaanada la dagaalanka argagixisada — iyo siyaasadaha la dagaalanka argagixisada, saameynta ay ku yeesheen Muslimiinta, carabta, bulshooyinka koonfurta Aasiya ee maraykanka ku nool.

- Golaha Congressku waa in uu ansixiyaa soo afjarida Sharciga Tixraaca Isirka (the End Racial Profiling Act), iyo sharciyada federaalka si loo mamnuuco Sharciga xoojinta Tixraaca Isirka.

- Waaxda Caddaaladu (DOJ) waa in ay dib ugu laabataa Xeerarka Hagayaasha Federaalka ee ay soo saartay bishii June 2003 ee ku saabsanaa Tixraaca Isirka si lagu baa'iyo siyaasaha wayda ah ee lagu sugayo amniga xuduudda iyo qaranka, laguna soo daro tixraacid ku salaysan diinta,iyo qowmijyada, lana xaqiijiyo in sharci hagayaashan ay noqdaan kuwo la hirgelin karo.

- Waaxda DOJ waa in ay furtaa baadhitaan lagu sameeyo dhamaan dacwadaha la xidhiidha argagixisada oo loo adeegsaday wargeliyeyaasha tan iyo bishii September 11, 2001, iyada oo daraasad lagu sameynayo guuldarooyinka iyo wax qabadka wargeiyeyaasha dawladu adeegsatay, xaaladaha ay ku soo ifbaxeen, laguna shaqa geliyey, noocyada xo gee ay uruuriyeen, iyo doorka ay ku leeyihiin kicinta shirqoolada argagixisada.

- Cid haysa Xeer Ilaaliyaha Guud waa in uu soo saaraa xeerar cusub oo wax hagaya oo badala xeerar hagayaashii Mukasey ee sanadkii 2008, xeerar hagayaashii Gonzales 2006 ee Ilaha Lagu Kalsoon yahay ee Aadnaha, iyo xeerar hagayaashii Ashcroft ee

2002 ee hay'ada FBI ee Hawlgalada Basaasiyiinta. Xeerar hagayaashan cusub ayaa in ayb meesha ka saaraan sharciyeynta baadhitaan hordhac ah oo "oo darsaya" heerka la joogo. Waxaa intaas dheer, Xeerar hagayaashan cusub waa in ay xaqiijiyaan in :

- Hay'ada FBI iyo hay'daha kale ee sharci xoojintu waa in aanay furin bhaadhitaano, ay qeyb ka yihiin wargeliyeyaasha qarsoon, oo ka dhan ah shaqsiyaadka iyada oo aan hore loogu hayn cadeymo muujinaya in uu qof dambiileyay ama, ugu yaraan, lagu xidhiidhinayo fal dambiyeed.
- Hay'ada FBI iyo hay'daha kale ee sharci xoojintu waa in aan loo ogolaan in ay bartilmaamaystaan shaqsiyaadka iyo bulshooyinka iyaga oo u mraya la socodka dha qdhaqaaqooda,wargeliyeyaasha, ama xeelado xog uruurineed oo kale oo ku saabsan isirka, diinta, ama asl ahaan qaranka uu ka soo jeedo ama afkaaraha siyaasadeed ama diineed ee uu leeyahay ama aaminsan yahay.
- Hay'ada FBI waa in ay xaaraantinimaysaa isticmaalka wargeliyeyaasha ku hawlan shirqoolka dambi gelinta.

- Waaxda Booliska New York (NYPD) waa in ay dib u eegtaa xeerarkeeda hagayaasha ah oo ay ogolaataa oo kaliya baadhitaanada marka ay jiraan shaki muuqda oo suuragal ah oo horseedi kara fal dambiyeed dhaca.

© Lyric R. Cabral

Laga soo bilaabo Sebteember 11, 2001, dawlada Maraykanku waxay ugaadhsanaysay Muslimiinta Maraykanka ku nool iyada oo u soo dirtay sirdoonayaal lacag la siiyey, oo aan tababarnayn masaajidyada iyo bulshooyinka Muslimiinta ah. Falkani wuxuu horseeday in kabadan 200 (qof) in lagu soo oogo dacwado la xidhiidha argagixisanimo. Dawladu waxay ku andacootay in dacwadahani ay yihiin guulo laga soo hooyey waxa loogu yeedho dagaalka ka dhanka ah argagixisanimada.Haseyeeshee, sanadihii ugu danbeeyey, shaqsiyaad hore uga shaqeyn jiray Xafiiska Danbi – baadhida Federaalka (FBI), Sharci dajiyeyaasha maxaliga ah, warbaahinta, dadweynaha, iyo kooxaha ka aasaasan bulshooyinka ayaa bilaabay in ay sxu'aalo ka keenaan sharcinimada iyo wax ku oolnimada falalkan. Cambaarayntani waa Walaac laga qabo in noocan siyaasadeed iyo natiijooyinkooda dacwad soo oogida ah ay isku noqonayaan dabin danbiyeed.

Warbixintani waxay darsaysaa saddex dacwadood oo waaweyn oo argagixisanimo, kuwaas oo soo wargeliyeyaasha dawladu ay door muhiim ah ka ciyareen hagida iyo dhisida shirqooladaas kuwaas oo dabadeeto lagu soo oogay dacwado.Sadexdaas dacwadoodba, hay'ada FBI ama Waaxda Boliiska New York (NYPD) waxay wargeliyeyaal lacag la siiyey u direen bulshooyinka Muslimiinta ah ama qoysaska iyadoon wax shaki ah laga muujin fal danbiyeed gaadh ah.

CENTER FOR HUMAN RIGHTS AND GLOBAL JUSTICE

New York University School of Law
139 MacDougal Street, 5th Floor
New York, NY 10012

www.chrgj.org

© Lyric R. Cabral